

Good Local Governance and Leadership Training Programme (GLTP)

Hab-xukunka Degaan ee Habboon iyo Barnaamijka
Tababarka Hoggaamineed

DHISKA BIRIISHYADA

U DHEXEeya MUWADINIINTA IYO DAWLADAHA
HOOSE SI AY SI TAYO BADAN U WADA
SHAQEEYAAN

TUBTII

MAARAYNTA ISKU DHACA IYO IS AFGARANSHAWAAGA.

QAYBTA 2aad

QALAB ADEEG



UN-HABITAT



European Commission

DSHISKA Biriishyada

Waxa qoray
FRED FISHER

Waxana ka qaybqaatay khubaro ka tirsanaa

- ❖ Asxaabta reer Hungary
- ❖ Asxaabta reer Slovakia
- ❖ Asxaabta reer Romania
- ❖ Asxaabta isbadalka diimoqraddiga ah ee caalamiga ah.
- ❖ Jaamacadda texas ee ku taal Arlington
- ❖ Xarunta Qaramada Midoobay ee Dad Dajinta UNCHS (Habitat)
- ❖ Machadyada tababarka ee dalalka CEE/SEE

Asxaabta fadhiga Romania ee horumarinta bulshada (FPDL) ayaa maamulayay diyaarinta buugan iyaga oo ka helay tageero maal galin ah:

Barnaamijka Gogol Xaadhka Dawladda Hoose (LGE) ee Machadka Bulshada Madaxa Bannaan.

Xarunta Qaramada Midoobay ee Dad Dajinta (Habitat), Barnaamijkeeda Tababarka Hoggaanka iyo Maamulka ee ay maal galisay Xukuumada Netherlands.

Qaabaynta Buuga: Paul POPESCU.

DSHISKA Biriishyada

TUSMO

Aqoonsi	4
Hordhac	5
Fikrado kusaabsan isticmaalka qalabka adeega	7
Qalabka 1. Is kulaylin/hadal furitaan ah	9
Qalabka 2. Siyaalaha suurtagalka ah ee wax loo soo bandhigi karo	11
Qalabka 3. Layli dareen fikradeed ah	14
Qalabka 4. Waxyaalaha isku dhaca dhaliya iyo istaraatijiyooyinka dhexgalka	18
Qalabka 5. Uduga bilaabayaasha iyo Tamar Galiyeyaasha	21
Qalabka 6. Iskudhaca oo macluumaad laga ururiyo	25
Baadhitaan xaaladeed: Arin xaafadeed	27
Qalabka 7. Aragti is waydaarsi	30
Qalabka 8. kaalin ka gorgortanka	34
Qalabka 9. Istaraatijiyooyinka isku dhac maaraynta	39
Qalabka 10. Jilista kaalinta goragortanka	41
Xaalad baadhis: Daryeelka xarunta xanaanada maalinimo ee xaafadda	43
Qalabka 11. Qiimaynta tusaalayaasha dhexdhexaadinta iyo kuwa kuu gaar ah oo aad curiso	47
Qalabka 12. Maaraynta isku dhaca iyo awooda	51
Qalabka 13. Matalaad khilaaf	57
Xaalad baadhis: khilaaf ku saabsan ogolaansho dhis	59
Qalabka 14. Sawirada wada hadalka	62
Qalabka 15. Barashada farshaxanka fiican ee wada hadalka	65
Qalabka 16. Qorshaynta sidii waxa la bartay loo fulin lahaa	70
Eray bixin (Glossary)	73

Xarunta Qaramada Midoobay ee Dad Dajinta (UNCHS)

UNCHS: Sanduuqa Boosta 30030, Nairobi, Kenya

Website: <http://www.unchs.org/unchs1/11m/manual.htm>

Dhiska biriishyada oo loo marayo maaraynta isku dhacyada iyo is afgaransho waaga – qaybtii 2^{aad}

fikradaha lagu xusay qoraalka rasmiga ihi
waa tii goraayada mana aha qasab in ay
tahay tii Qaramada Midoobay .
July 2005

DSHISKA Biriishyada

AQOONSI

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee “dhiska biriishyadaka u dhexeeya muwaadiniinta iyo dawladaha hoose si ay si wax – ku - ool ah oo wada jir ah u wada shaqeeyaan iyada oo la adeegsanayo maaraynta isku dhaca iyo is afgaranshawaaga” waxay ku hirgashay Barnaamijka Is-maamulka Fiican iyo Tababarka Hoggaanka la soo doortay ee ay maal-gelisay Komishanka Yurub (EU), isla markaana uu fuliyay Xafiis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika iyo Dalalka Carbeed.

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee buugan, waxa ka hawl-galay Mr. Maxamad X. Maxamuud oo tarjumadda iyo tifaftirka ku xeel dheer. Barnaamijka Qaramada Midoobay ee Degsiimaha Aadamaha (UN-HABITAT) laanta Hargeysa ku taal ayaa gacan ka gaysatay hirgelinta hawshan.

Waxa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiga Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamicadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baadhista iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhexe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariyay tarjumadda ereyada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

This manual is part of a series that was published by the UN-HABITAT Training and Capacity Building Branch (TCBB) for ‘capacity building of NGOs and CBOs’ and ‘Building Bridges between local governments and citizens’. As part of the ‘Good Local Governance and Leadership Training Programme (GLTP)’, these manuals were translated into Somali and adapted to the Somali context. The GLTP was funded by the European Commission and implemented by UN-HABITAT under the Regional Office for Africa and Arab States (ROAAS) between July 2003 and June 2005. More information on this project can be found at www.unhabitat.org/roaas.

DSHISKA Biriishyada

HORDHAC

Waxa ay buugagan taxana ihi la kulmeen olole caalami ah oo ay qaaday Qaramada Midoobay Xarunteeda Dad Dajinta (UN-HABITAT) kuna saabsanaa xukunka magaalooyinka. Mawduucan ah “cid kasta xera galin” oo milicsanaya ololahan aragtidiisa iyo istaraatajyadiisa waxa uu si qoto dheer gun dhig ugu yahay mawduucyada iyo istaraatiijiyada waxbarashada ee ku xusan buugagan. Waxa loo qorsheeyay buugagan loona qoray in ay u adeegaan baahiyaha horumarinta ururada aan dawliga ahayn iyo ururada bulshada, hoggankooda iyo shaqaalahooda, waxana ay fulinta waxbarashadu ku gudbaysaa iyada oo la joogteeyo lana yimaado niyad dhab ah oo ku dhisan wax wada qabsasho ballaadhan.

Waxa jira caddayn isa soo taraysa iyo aqoonsi kordhaya oo tusaya in ay jiraan mawaadiic dhawr ah oo qeexaya, qaabaynayana ajandaha xukun magaalood ee qarniga cusub ama kunkan sanadood ee cusub. Arinka u horeeya ee xeragalin ihi waxa uu ku saabsan yahay in dawladaha hoose iyo bulshooyinka doonaya in ay noqdaan darafka hoggaaminaya isbadalka bulshada iyo dhaqaaluhu, waa inay qiraan inay muhiim tahay in ay cid kasta ka qaybgaliyaan, iyaga oo aan eegeyn hantidooda, Jinsigooda (lab iyo dhadig) da’dooda, haybtooda, marka la gaadhayo go’aan raadaynaya xaalada noloshooda guud.

Waxa labaad ee in la qiro ay tahay waa hoggaanka la wadaago, oo ah mid dhex qaadaya xididadii al kumiyada jira iyo bulshada. Sida fiicani waa in golayaashaa hoggaan wadaag ihi, ay ku dhisan yihiin is aaminaad dadka dhexdooda ah, ra’yi is waydaarsi xor ah oo dhex yaal dhammaan dadka meeshaa wax ku leh iyo istaraatiijyo ballaadhan oo fikradihii wanaagsanaa iyo aragtidi la wadaagayay loo badalayo ficil la taaban karo.

Sida lagu qeexay gogol dhiga, taxanahan qalabka fulinta waxbarashadu, wuxuu ahaa awood ay iska kaashadeen ururka asxaabta Romania ee horumarinta bulshada, iyo xarunta qaramada midoobay e UNCHS (UN-Habitat) iyo machadka bulshada ee madaxa bannaan. Waxana qaybta wayn ee maal galinta mashruucan bixiyay barnaamijka machadka madaxa bannaan ee dhiska dawlada hoose, iyada oo taageero dhaqaale oo kale ay gaysatay qaramada midoobay-UNCHS (UN-Habitat) iyo xukuumada Netherlands. Halka ay asxaabata Romania ay ka maamuleen mashruuca, isaga oo hoos imanayay barnaamijkoodii waxqabad kobcinta ee ku saabsanaa xukunka iyo hoggaanka bulshada ee bariga iyo badhtamaha qaarada Europe. Waxa masuuliyadaha ka mid ahaa in lagu sameeyay tijaabo goobeed buugagii qorshaynta ka qaybqaadashada iyo maaraynta isku dhaca iyo isafgaransha waaga oo ahaa barnaamij tababarayaasha lagu tababaray, kuna saabsanaa 18 qof oo ka qaybgalayaal ah kuwaas oo ka kala socday 13 dal oo bariga iyo badhtamaha qaarada Europe ah iyo xubno ka tirsan barwaaqo sooranka dawladaha madaxa bannaan.

Ku dhaqaaqida buugagan tababarka ah waxa uu bilawgoodii ka yimid laba gobol oo kala duwan oo aduunkan ah. Gudidda hoggaamisa barnaamijka kobcinta waxqabad goboleedka bariga iyo qaarada Europe oo tilmaamay in maaraynta isku dhaca iyo qorshaynta ka qaybqaadashadu ay yihiin laba baahiyood oo gobolkoodu tababar ahaan u baahan yahay, tan oo ay ku soo qaadeen wada tashigoodii 1997. Iyaguna kooxo kala duwan oo ururo aan dawli ahayn (NGO) iyo ururo bulsho (CBO) iyo madax

DSHISKA Biriishyada

dawlada hoose ah oo ka tirsan dhul ballaadhan oo ah dhulka saxaraha Africa ka hooseeya ayaa kulmay 1998kii. Iyagaana tilmaamay mawduucyadan, iyo qaar kale oo uu taxanahani ka hadlay, una arkay in ay yihiin baahiyo tababarkoodu muhiim yahay.

Ugu danbayn, waxa aan rabaa in aan u mahad naqo Fred Fisher oo ahaa mu'alifkii u mudnaa qoraayada taxanahan iyo kooxdii kala qaybqaadatay ee heerka sare ahayd, isagaana (waa Fisher eh) isku xidhayay si loo farsama-diyaariyo qalabkan. Waxana kooxdaa ka mid ahaa : Ana Vasilache, agaasimihii asxaabta Romania, taasoo ka maamulaysay geedi socodka hawshan dalka Romania, Kinga Goncz iyo Dusan Ondrusk, oo ka horana yahay agaasimihii asxaabta Hungary, ka danbana yahay agaasimihii asxaabta Slovakia, David Tees oo sanado badan ka qaybqaatay buugaag iyo qoraalo badan oo hayadda UNCHS ay soo saartay, tababarayaashii ka qaybqaatay tijaabo goobeedka qalabkan iyo kooxdii xirfadlayda ahayd ee hayada UNCHS ee uu madaxa u haa Tomasz Sudra kuwaas oo khibradoodii wax ku oolka ahayd galiyay qalabkan si waxa soo baxaya mid saafiya u noqdo.

Anna Kajumulo Tibaijuka
Under Secretary General and
Executive Director (UN-HABITAT)

DSHISKA Biriishyada

FIKRADO KU SAABSAN ISTICMAALKA QALABKAN ADEEG

Qaybta labaad ee buugani waxa weeye qalab adeeg oo loogu talagalay tababrayaasha iyo fudaydiyayaasha doonaya in ay qorsheeyaan aqoon is waydaarsiyo iyo noocyada kale ee khibradaha wax barasho iyaga oo ka duulaya fikradihii iyo ra'iyadii ku yimid buugii koobaad. Qalabkani waxa uu cuskanayaa khibrado waxbarasho oo loo qorsheeyay in ay ka qaybgalayaasha ka caawiyaan sidii ay u milicsan lahaayeen khibradahoodii iyo aqoontoodii arinkan ku saabsanayd una xoojin lahaayeen xirfadahooda si ay si tayo badan ugu maareeyaan isku dhaca iyo khilaafaadka tababarkan ka dib. Qalabkanina qaab muhiim ah oo gaar ah looma dajin, layskugumana xig-xigsiin si loo dhuffo oo loogu tuuro goob aqoon iswaydaarsi sida shaqo lagu farayaraystay oo la gabagabeeyay oo fulintii uuni hadhay. Markaa sida qalabyada tababareed ee kale ee taxanahan waxa aanu ku leenahay xor ayaad u tahay in aad wax ka badasho si ay adiga baahiyaahaaga wax barasho ujeedeeyinkooda u fuliso iyo waliba baahiyaha dadka wax kaa sugaya ee aad la shaqaynayso.

Waxa aanu ku soo darnay qalab isku jira oo milicsanaya wixii buugii koowaad ku xusnaa iyo layliyo loo qorsheeyay in ay taabtaan arimo dhawr ah oo kooxaha daryeelaya. Qalabkan wax daryeelaya waxa inta badan lagu sheegayaa hadal furayaashii, bilaabayaashii, tamar galiyayaal. Mararka qaar layliyadan koox daryeelka ihi waxa ay u ekaanayaan qaar fool xun hadii aad loo isticmaalo ama lagu talaxtago. Iyada oo ay dhacdo in qalabkan daryeel ama "deegaameed" in mararka qaar lagu wareero oo la kala saari waayo, waxa loo baahanyahay bal in waxoogaa la falanqeeyo.

Furfurayaasha iyo bilaabayaasha wax badan ayaa ka dhexeeya waxna waa ay ku kala duwan yihiin. Furfurayaashu waa qaar aan iyagu mawduuc lahayn, halka bilaabayaashu sida inta badan lagu sharaxo ay la xidhiidhaan mawduuca lagaga hadlayo aqoon iswaydaarsiga ama goobta waxbarasho. Furfurayaasha waxa la isticmaalaa marka aanay xubnaha kooxdu qof qof isu aqoon, waa layliyo loo isticmaalo in xubnuhu is bartaan oo ay isla jaanqaadaan iyaga oo ah asxaab wax wada baranaysa.

Bilaabayaashu, dhinaca kale, waa qalab caawinaya ka qaybqaatayaashu in ay si dhib yar mawduucii u galaan, waxa ay dhigayaan sallaanka waxbarasho wadaag, waxa ay ku caawinayaan kooxda, oo uu fudaydiyuhu ku jiro, in ay iska jiraan bilowga xun, si guudna waxa ay ka caawinayaan ka qaybgalayaashii in ay la qabsadaan qalabka halkan ku jira ee laga hadli doono. Waxa weeye hordhac howshii dadka ku wacyi galinaya,

Nooca sedexaad ee layliga ah ee jawiga lagu dhisayo kooxdana lagu daryeelayaa waxa weeye tamargaliyaha. Waa arin xiiso leh oo kooxda wadar ahaan dareen ku dhalinaya marka ay ku timaado tamar jabidi. Waxa aanu helnay in kooxaha tababarka intooda badani ay leeyihiin ka qaybgalayaal xirfad u leh in ay

DSHISKA Biriishyada

hoggaamiyaan layliyada tababarka ee noocan ah. Markaa ka faa'iidayso iyaga. Dhinaca kale, faraha ha ka qaadin masuuliyada buuxda ee baranaamijka.

Waxana aanu hubnaa in la tababarayaasha qaar ay u yimaadaan barnaamijyada tababarka si ay ugu tabarucaan qabashada xilalka hadal furfurka, tamarglinta iyo bilowga hawsha. Waxana weeye kayd weyn hase yeeshee marka aqoon isweydaarsiyada qaar ay dhammaadaan, ee ka qayb galayaashu ay qaadaan masuuliyada daryeelka hawlahaan, way adagtahay in la tilmaamo qofka meesha ka talinaya.

Sidaynu hore u sheegnay, qalabkan loogama jeedo in sida loo soo bandhigay loo isticmaalo. Waxase weeye qalab aad isticmaalayso xiliga aad u baahato hadii baahiyahaaga uu wax ka tarayo. Waxa kale oo aanu kugu dhiirinaynaa in aad wax ka badasho, si uu munaasib uga noqdo looguna isticmaalikaro, baahiyaha wax barasho ee ka qayb galayaasha.

QALABKA 1

ISKULAYLIN/HADAL FURITAAN AH

**La taliye
Safar**

Sawirka khariidadii goobta isku dhac maaraynta

Lataliye safar: layligani waxa uu leeyahay awood ka shishaysa waxa lagu soo jeediyay geedi socodka soo socda. Tusaale ahaan, waxa aad ku noqon kartaa weedhihii ay ka qayb galayaashu curiyeen e isku dhaca ku saabsanaa oo aad ku xidhi kartaa darajooyinkii isku dhaca e uu sheegay Moore (eeg qalabka 4).

Waxa aad ka qaybgalayaasha waydiinkartaa in ay arimaha u dhigaan heerarka isku dhacyada, sida mid dadka dhexyaal, mid urureed, mid xuduudeed ama ku laabo kaadhahka qoraaladaada marka aqoon iswaydaarsigu dhamaado, waxaana aad waydiisaa ka qaybgalayaasha in ay ku daraan wax yaabahan kaadhahkooda amaba badalaan. Waxa aanu hubnaa in adiga iyo ka qaybgalayaashu aad haysaan fikrado badan oo kale oo lagula soo baxayo macdan qaali ah marka lagu jiro aqoon iswaydaarsiga, hadaba kaadhahku yaanay kaa fogaan.

Ujeedada waxbarashada

Layligan waxa looga jeedaa in uu ka qaybgalayaasha siiyo fursad ay isku bartaan kuna bilaabaan baadhitaanka fikradaha iyo rayiyada la xidhiidha isku dhac maaraynta.

Waqtiga la rabo

Waa ilaa 60 daqiiqo: hadii uu ka dheeraado waxa ay u egtahay in ka qaybgalayaashu ay la yimaadeen khariidado fiican oo goobta aqoon iswaydaarsigu ka hadlayo ku saabsan.

Xiligaaga iyo wixii ku soo jiidaba dib u habayn sidan waafaqsan ku samee.

Geedi socod

1. U sharax layliga si ay ka qaybgalayaashu qof qof isu bartaan oo ay u muujiyaan dareenkooda iyo khibradooda ku saabsan isku dhaca. Sii ka qaybgalayaasha 4 ilaa 6 kaadhahka tasmada ah oo waawayn, waxana aad waydiisaa in ay magacyadooda kaadhahka mid ka mid ah ku qoraan. Way fiicnaanlahayd hadii kaadhkaasi midab ka duwan kuwa kale uu leeyahay. Kaadhahka soo hadhay waxa aad ka doontaa in ay ku qoraan eray ama weedh ama sawir ama calaamad tuseysa sida qof ahaan ay isku dhaca(kaadhkasta ku yaal) u dareemayaan. Si aad u hubiso in shaqadani caddaatay, waxa aanu kuu soo jeedinaynaa in su'aashan soo socota aad far waawayn sabuurada ama waraaqahan waawayn e la rogrogo uugu qorto:

DSHISKA Biriishyada

Marka aad ka fikirto “isku dhac ” waa maxay fikradaha, dareemada, sawirada isla markaa maskaxdaada hor yimaadaa?

2. Marka ay ka qaybgalayaashu fikradahooda ku qoraan kaadhka tasmada, waydii, qof kasta mar, in uu is sheego oo uu tilmaamo waxa kaadhahkiisa ku qoran. Xiligan waxa aad waydiinaysaa oo kaliya su'aalo aad wax caddayn ku codsanayso waxa aad ka codsataa in ay kaadhahkooda ku dhajiyaan gidaarka iyaga oo kaadhka magacoodu ku qoranyahay xaga sare marinaya, kaadhahka kalana hoosta marinaya.
3. Waxa aad waydiisaa kooxda wax dareen guud ah oo fikradaha iyo sawirada la soo dha-dhajiyay ku saabsan.
4. U qaybi kooxda sadex ama afar kooxood oo yaryar, oo kooxdiiiba aanay ka badnayn lix ka qaybgale, waxaana aad ka codsataa in ay waraaqo caadi ah ku sawiraan khariiradii fikradooda iyaga oo tusaya waxa ay kaqabaan fikradaha la soo bandhigay. waxa laga yaabaa in aad u baahato xasuusinta khariirada fikradaha maxaa yeelay in lagu weeydiiyo ayay u dhawdahay, waxa weeye khariiradaasi hab loo ururiyay fikradihii, xogtii, macloomaadkii iyo wararkii yaryaraa e kale e fikrada ku saabsanaa si ay u bixiso qaab shaqo oo looga fikiri karo arin gaar ah sida maaraynta isku dhaca
5. Kooxihii ururi oo nidaami oo waa in ay khariiradihii fikradahooda gidaarka ah ku soo bandhigaan.
6. Marka ka qaybgalayaashii ay shaqadan dhammeeyaan, waxa aad ku dhiirisaa dood layligii iyo macnihiisii ku saabsan si ay aad ugu gartaan xaalada iyo natiijooyinka isku dhaca, ka fikir in aad isticmaasho su'aalahan soo socda qaar si aad doodii hore ugu mariso.

- Miyaad sawirdan iyo erayadan qaar kamid ah la yaabtay? Maxaa kuugu layaab badnaa?
- Halkee ayay isaga egyihiin ama ku kala duwan yihiin sida ka qaybgalayaashu ay u arkaan ama u sharaxeen isku dhaca.
- Sidee ayaad tababare ahaan ama dhexdhexaadiye ahaan u isticmaali kartaa layliga noocan ah si loo caawiyo dadka isku dhacu haysto si ay ugu gudbaan xal nabadeed?

Haka baqin in aad dib u habayn ku samayso layligan si aad uuga fuudh yeesho baahiyaha kooxda aad la shaqaynayso.

Waxaa loo qorsheeyay in wax laga badalo ama dib u qaabayn lagu sameeyo (layliga) isla goobtaa dhexdeeda marka fikrado iyo aragtiyo ay muuqdaan.

DSHISKA Biriishyada

QALABKA 2: SIYAALAHA SUURT AGALKA AH EE WAX LOO SOO BANDHIGI KARO

**Fikrado aan arin xanbaarsanayan waa madhni
Male aan fikrado ka dambaynina
Waa indhalii**

IMMANUEL KANT

Iyada oo khudbadaha qaar badani aanay la jaanqaadayn mabadiida waxbarashada khibrada ku dhisan, waxa aanu kuu soo jeedinaynaa in aad halkoodii ku isticmaasho wadahalada laba dhinac ah ama dood lahaygo si loo soo bandhigo xog arinkan la xidhiidha ama fikrad ku saabsan marxalada labaad ee fulinta waxbarashada kooxda. Murtidan soo socota waxa loo qorsheeyay in ay kaa caawiso diyaarinta, soo bandhigida fikrado cusub, ra'ayiyo, macluumaad, xog ama qalab arinkaa laxidhiidha.

Magaca mawduuca doodaada la haygo:

.....
.....
.....
.....

Qodobada muhiimka ah ee aad doonayso in aad sheegto:

(sadex ama afar ayaa laga yaabaa in ay ku filan tahay, hadii aad rabto in ka qaybgalayaashu ay xusuustaan)

.....
.....
.....
.....
.....

DSHISKA Biriishyada

Tusaalayaasha nolosha ee dhabta ah ee aad rabto in aad isticmaasho si aad qodobadaada u caddayso:

.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....

Su'aalo la waydiinaayo dhagaystayaashaada:

Waxa kuwan loo qorsheeyay in ay xasuustaan tilmaamahooda ku saabsan qodobada aad sheegayso khibrada ay u leeyihiin?

.....
.....
.....
.....
.....
.....

Qodobadaadii uugu muhiimsanaa oo la soo ururiyay ama u sheegid (dadka) wixii aad hore uugu sheegtay.

U sharax sida aad u qorshaysatay in aad u isticmaasho muuqaalo (wax la daawado) xoojinaya bandhigaaga:

.....
.....
.....
.....
.....
.....

DSHISKA Biriishyada

La taliye
Safar

Lataliye safar oo kale : socdaalkan baadhitaanka ihi waxa uu noqon mid ku soo jiita inta aadan sii fogaan, waxa aanu kuu soo jeedinaynaa in aad dib u eegto qalabkii adeeg ee aynu ku hoos ururinay (calaamada) qalabka 5. Hadal furfurayaasha, bilaabayaasha iyo tamargaliyayaashaasi waxa weeye wax yar oo ka mid ah wax yaala badan oo aad u baahantahay in aqoon iswaydaarsiga aad ku isticmaasho inta uu socdo.

Waliba waxa aanu xiligan kugu dhiirinaynaa in aad ka fikirto sida aad u qaadan karto taxanaha qalabka si aad ugu qorshayso aqoon iswaydaarsi mid ka mid ah kooxaha macmiilkaaga ah.

Qalabka adeeg ee aad ugu danbaynta goosanayso in aad isticmaasho waxa uu ku xidhanyahay dadka aad rabto in ay ku dhagaysataan, iyo baahiyahooda waxbarasho iyo awoodaada aad ku bixin karto tababarka adoo eegaya baahiyaha ay ka fikirayaan. Ha u laba lugoodin in aad qaadata oo aad doorato waxa aad isleedahay qalabka buugan wuu ka shaqayn karaa, waxna ka badal si uu uugu habboonaado baahiyaha waxbarasho ee macaamiishaada, meelaha dhiman ku buuxi qalabyo adeeg oo aad keyd kale ka soo qaadatay, waxaana ka sii wada mihiimsan in aad adigu qaar curiso.

DSHISKA Biriishyada

QALABKA 3: LAYLI DAREEN FIKRADEED AH

Cutubka labaad ee fahamka dabiicada isku dhaca waxa ku jira dood ku saabsan kaalinta dareenku ka qaato dhiirinta iyo hurinta khilaafaadka iyo isku dhacyada. Dareemadu inta badan waxa weeye caddayn korka sare ah oo tusaysa waxa eexasho iyo cid jeclaysi ama nacayb hoosta jiifa. Layligan yar waxa loo qorsheeyay in uu ku caawiyo ka qaybgalayaasha in ay gartaan in sida ay wax u dareemayaan (ama u arkaan) ay ka duwanaa karto sida dadka kale wax u arkaan. Waxa kale oo uu sawirayaa in xaaladaha qaar aanay jirin jawaabo ama sax ah ama khalad ahi, ee ay yihiin uun qaar kala duwan oo ku dhisan sida cid kastaa wax u aragto.

Layliyada labajibaaranayaashani waxa ay noqon karaan is kulaylin horseed u ah dood qoto dheer oo ku saabsan fikradaha ka jira ka qaygalaha ururkiisa ama bulshadiisa, taas oo keeni karta khilaafaad aad u khatar ah ama isku dhac hadii aan la muujin oo aan laga hadlin. Noqo wax curiye marka aad isticmaalayso layligan fudud si aad gunta ugu dhaadhacdo.


Ujeedada waxbarashada: In aad qaadato aragtida ah in ay jirto siyaalo aan mid kaliya ahayn oo loo eegi karo mushkilad ama fursad.

Xiliga la rabo: 20 – 30 daqiiqo, ama in ka badan hadii aad u qaadato xaga marxalada labaad.

Kaydka loo baahanyahay: waxba.

Geedi socodka: Marxaalada 1

1. Ku sawir suurada soo socota waraaqaha balballaadhan ee la rogogo (ama sabuurad) far qofkasta oo kooxda ka mid ahi uu si cad u arki karo. Qof kasta sii warqad yar oo cad. Adiga oo aan wax hordhac ah ama sharax ah samayn waydii ka qaybgalayaasha in ay eegaan sawirka oo ay ku qoraan warqada yar jawaabta su'aashan: imisa labajibaarane ayaad meesha ku aragtaa?



2. Waxa aad siisaa ka qaybgalayaasha 30 ilbidhiqsi si ay u qoraan jawaabahooda.

DSHISKA Biriishyada

Fiirada tababaraha:

Sawirada ku xusan gabagabada hawshan ayaa tusaya sida loo soo saarayo tirada labajiraanayaasha e ka qaybgalyaashu ay ku qoridoonaan jawaabahooda. Waxaa caadi ahaan tiradu noqondoontaa 16 ilaa 30.

3. Ururi jawaabaha kana qaado tirooyinka ku xusan jawaabtooda adoo ku qoraya waraaqaha balballaadhan naftooda, tirooyin kuna dadka ha u muuqdaan.
4. Marka dhammaan jawaabahoodii la qoro, waxa aad waydiisaa ka qaybgalayaasha ta ay u arakayaan in ay tahay jawaabta saxda ah. Jawaabta su'aashani waxa ay inta badan ku xidhan tahay tirada ugu badan ee labajibaarane ee qofku sheegay. Qaar ayaa laga yaabaa in ay yidhaahdaan jawaabaha oo dhammi waa sax, maxaa yeelay su'aasha ayaa ahayd inta labajibaarane ee aad aragto sheeg ee may ahayn imisa labajibaarane ayaa meeshaa ku jira. Tani waa jawaabta aad rajaynayso, maxaa yeelay waxa ay tilmaamaysaa arinka meeshaa ku jira oo ah waxa qof kasta u sax ah waxa uu markaa meesha ku arko. Dareenkeena fikradeed waa dhabtaa aynu aragno, taa ayaana aynu sheegnaa inta badan, kulana xidhiidhnaa dadka kale.
5. Bal waxa aad waydiisaa ka qaybgalayaasha waxa ay dareemeen marka qof uu sheegto in uu arkay labjibaaranayaal ka badan inta ay arkeen, **Tusaale ahaan:** in uu yidhaa waan ka shakiyay, waxa aan dareemay in aan gaabiyay, way isoo jiidatay oo in aan ogaadaan doonay. Waxa aad waydiisaa waxa ay sameeyeen marka ay xaqiiqsadeen in qof kale uu arkay labajibaaranayaal kuwooda ka badan, **Tusaale:** in ay yidhaahdaan dib ayaanu u eegnay bal in aanu eegno wixii aanu markii ugu horraysay seegnay; waxa aanu isku daynay in aanu eegno khaladka layliga ama macalinka oo si xun noogu bandhigay (tusay).
6. Waxa aad ku dhiirisaa in dood layliga laga sameeyo, adoo ka qaybgalayaasha waydiinaya waxa ay rayiyada kala duwan ee tirada labajibaaranayaasha ee ku qoran warqadaha balballaadhani tusayaan ee ah sida dadku ay u kala arki karaan arimaha xaaladaha isku dhaca.

Marxalada II: hoos u sii dhaadhac

Inaka oo ka duulayna dooda layligii labajibaaranayaasha, waxa aynu filaynaa in ka qaybgalayaasha laga yaabo in ay diyaar u yihiin in ay eegaan arin bulshada gudaheeda ah ama ururkooda ku saabsan oo lagu kala duwanyahay xaga fikirka oo laga yaabo in mustaqbalka aad loogu sii kala fogaado ama layskuba dhaco hadii aan xiliyadan dhaw la eegin. Tusaale ahaan, waxa dhici kara in ay tahay curinta nidaam shaqaalaha wax qabadkooda lagu qiimeeyo oo lagu isticmaalidoono si loo dalacsiiyo ama mushaharka loogu kordhiyo, ama cashuur iibka ah oo dheeraad ah oo la saarayo dhammaan badeecadaha iyo adeegyada ururada aan dawlaga ahayn iyo ururada bulshada, ama fikrada muwaadiniintu ka qabto qoysaskii reer miyiga oo ku soo

DSHISKA Biriishyada

qulqulaya magaaladii. Fikradaha xaaladaha laga qabaa waxa ay dhakhso isu sii rogi karaan qaar qoto dheeraada oo wajiyo badan loo dhigo.

Iyada oo la eegayo xaalad dhab ah oo hor taagan goobta shaqada ama bulshada ay ka qaybgalayaasha aqoon iswaydaarsigu ka soo jeedaan, waxa aad layli fikradeedka marxalada 1^{aad} raacisaa hawlahaan soo socda. Waxa aynu suurayn karnaa in marxaladani ay qaadanayso dhawr saacadood iyada oo la eegayo kolba arinka laga hadlayaa sida uu yahay. Bal adigu qiyaas inta waqti loo baahankaro.

1. Bal dhammaan kooxdu ha soo jeediyaan arin ama arimo ka jira ururadooda ama bulshooyinkooda, kaas oo caadi ah oo ay fahansanyihiin badi ka qaybgalayaashu. Ku soo ururi liiska aad hesho mid ama laba arimood haday suurtagal tahay. Hawshani waxa ay dhib yaraanaysaa hadii kooxda la ururiyo si arin gaar ah ay uuga hadlaan.
2. Samee kooxo hawleed yaryar, haku qoraan waraaq caadi ah fikradaha kala duwan ee ama ay ka qabaan iyagu xaaladaa (arinkaa), ama ka maqleen dadka kale ama siyaabo kale ku ogaadeen, sida jaraa'idka dalka oo ay ka akhriyeen.
3. Bal koox kastaa fikradaha ha u kala hor mariso sida ay ukala daran yihiin waa xaga suurta galka in isku dhac ay hurin karto, ama ha siiyaan mid kasta darajo kul ah, iyada oo kolba marka kulku kor u kaco ay kordhayso fursada huritaanka holac lama filaan ah.
4. Hadii kooxuhu ay arin isku mid ah ku wada hawlanyihiin, kooxuhu dib ha u kulmaan hana qoraan liisaskooda si laysku ag dhigo.
5. Dib u kulansii kooxo hawleedkii hala eego waxa la qaban karo, iyo badalaada fikradaha jira si hoos loogu dhigo suurtagalka khilaaf ballaadhan oo dhaca oo arinkan ku saabsan, ama in la yareeyo suurtagalka isku dhac mustaqbalka ah.
6. Qor qorshe hawleedyadii kana dooda.

DSHISKA Biriishyada

Waxa hoos aad ku arki shax sharaxaysa inta labajibaarane ee suurto gal ah ee ka qaybgalayaashu ka fikiri karaan layligan. Tira kasta oo ka yar lix iyo toban ama ka badan sodon waxa ay mudantahay in loo arko jawaab wax abuurid leh.

1	2	3	4
5	6	7	8
9	10	11	12
13	14	15	16

17	18
19	20

21	22

	23	
	24	

	25	

	26	

27		
		28

	29	
30		

DSHISKA Biriishyada

QALABKA 4

WAXYAALAHA ISKU DHACA DHALIYA IYO ISTARAATIJIYOYINKA DHEXGALKA

Ujeedooyinka waxbarashada: si loo helo aqoontii iyo xirfadihii lagu tilmaami lahaa sababaha isku dhaca iyo suurtagalka siyaalaha dhexgalka.

Waqtiga la rabo: 75 ilaa 90 daqiiqadood.

Kaydka la rabo: waraaqo la socda layligan iyo waraaqihii caadiga ahaa, qalin wax lagu calaamadiyo, xabag, lana doorbidaayo in ay tahay nooc aan gidaarka goobta wax yeelo soo gaadhsiinayn.

Geedi socodka:

1. Soo bandhig layliga adoo waxoogaa faahfaahin ah ka bixinaya baahida loo qabo in la tilmaami karo sababaha keena isku dhaca iyo khilaafaadka dhexmara dadka, ururada, bulshooyinka, umadaha IWM. Si qofku u noqdo maareeye isku dhac oo tayo leh waxa uu u baahanyahay khariirad fikradeed cad oo ku saabsan waxa dhaliya isku dhacyada iyo khilaafaadka. Layligana waxa loo qorsheeyay in uu ka caawiyo ka qaybgalayaasha aqoon iswaydaarsiga sidii ay uugu qaybinlaaayeen isku dhacyada iyo khilaafaadka darajooyin tusaaya sababhooda kala duduwan. Waxa aad isticmaali khariirad fikradeed sababaha isku dhaca ku saabsan oo uu diyaariyay Christopher Moore (geedi socodka dhexdhexaadinta, P.27). Waxa uu tilmaamayaa shan darajo oo waawayn oo **sababaha isku dhaca ah** : macluumaad, dan, qaab, wax la qiimeeyo, iyo xidhiidh. Waxa laga yaabaa in aad u baahato tusaale bixin mid kasta ku saabsan, hasa wada bixin kaydkaaga fikradaha fiican ah. Hawshaa ka qaybgalayaasha ayaa laga rabaa eh.
2. U qaybi ka qaybgalayaasha shan koox hawleed oo yaryar adoo isticmaalaya hab malayn ah oo aadan hore u isticmaalin, sida adoo u qaybiya si aan waxba loo kala eegin waraaqo yaryar oo uu xarafka ugu horeeya ee sabab kasta oo (isku dhackeenta) darajadeedu ku taal. Tani waxa ay rabtaa in waraaqaha laga dhigo tiro siman, waa iyada oo tirada guud ee dadka shan loo qaybiyo.
3. Waxa aad fartaa koox walba in ay haystaan sodon daqiiqo si ay u sameeyaan laba liis:
 - A) Noocyada isku dhacyada ee ku jira darajooyinka sababaha ee loo qaybiyay (loo xilsaaray), sida: isku dhac macluumaad ku saabsan, waxa dhalin kara war khaldan oo qofka (cida) lasiiyo, iyo
 - B) Sida suurtagalka ah ee loo gudo gali karo ka hadalka wixii gaar ah ee dhaliyay isku dhaca.

DSHISKA Biriishyada

4. Dib u shiri kooxihii waxaana aad waydiisaa in ay qoraan liiska sababaha darajooyinkii isku dhaca ee loo xilsaaray iyo sida ay soo jeedinayaan in midkasta loo gudogalo.
5. Waxa aad waydiisaa ka qaybgalayaasha in ay bixiyaan tusaalayaal ku saabsan khibradahooda gaarka ah ee isku dhacyo ama khilaafaad ay soo mareen iyo istaraatiijiyoyinka gudo galka ee ay isticmaaleen si xaaladii ay u maareeyaan. Ku qor tusaalayaasha waraaqo gooni ah oo caadi ah, adoo racaya shantii darajo ee Moore.
6. Bixi khariiradii Moore ee isku dhaca si aad abaalgud uuga dhigto shaqada iican. Waa la sawiri karaa. Boga soo socda ayaa laga heli karaa.

DSHISKA Biriishyada

Wixii dhalinayay isku dhaca,	Kala dooradka lagu dhex gali karo
<p>Isku dhacyada macluumaadka</p> <ul style="list-style-type: none"> ◆ Xog la'aan ◆ Xog khaldan ◆ Aragtiyo kala duwan oo waxa macluumaadku la xidhiidho ah. ◆ Siyaala kala duwan oo loo micnaystay xogta macluumaadka. 	<p>Dhexgalka Macluumaadka</p> <ul style="list-style-type: none"> ◆ In laga heshiiyo macluumaadka muhiimka ihi kuwa ay yihiin. ◆ In laga heshiiyo geedi socodka ururinta macluumaadka. ◆ Diyaarinta qaab dhex ah oo lagu qiimeeyo macluumaadka. ◆ In khabiir dhinac saddexaad ah la isticmaalo si loo helo ra'yi dibadeed am si ismari waaga loo furdaamiyo.
<p>Isku dhac daneed:</p> <ul style="list-style-type: none"> ◆ Tartan dareen ama dhab ah oo ka dhashay: ◆ Dana jira ◆ Dana hab ahaaneed ◆ Dano nafsiiyeed 	<p>Dhexgalka arimaha danaha:</p> <ul style="list-style-type: none"> ◆ Danaha oo diirada la saaro, ma aha mawaaqifta. ◆ In la eego asaas dhex ah oo dhinacna jirin. ◆ In la diyaariyo xalal waafaqaya baahiyaha dhinacyada oo dhan. ◆ Ballaadhi kala dooradka iyo kaydka ◆ Diyaari isbarbardhig si aad u fuliso danaha culayskoodu kala duduwanyahay.
<p>Isku dhac qaab dhismeedka ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> ◆ Dhaqamo ama dhexgal wax dumis ah ◆ Khayraadka oo aan gacan ku hayntooda, lahaantooda ama qaybintooda loo sinnayn. ◆ Awoodii iyo suldaddii oo aan loo sinayn ◆ Arimo juqraafi, dabiici ah am deegaan oo hortaagan wax wada qabsigii. ◆ Cidhiidhi wakhti 	<p>Dhexgal qaab dhismeedka ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> ◆ Si cad u qeex ama u badal kaalmaha. ◆ Badal dhaqamada wax duminaya. ◆ Dib u meelayn ku samee lahaanshihii ama gacan ku hayntii khayraadka. ◆ Samee geedi socod go'an qaadasha ah oo la isla ogolyahay. ◆ U wareeg wax is dhaafsi aan mawaaqif ahayn ee dano ah. ◆ Hagaaji habka raadaynta ee dhinacyadu isticmaalaan ◆ Badal xidhiidhka dhinacyada ee dabiiciga ah ama deegaaneed. ◆ Hagaaji cidhiidhiga dibada ee dhinacyada haysta. ◆ Badal cidhiidhiga xaga wakhtiga ah.
<p>Isku dhac wax la qiimeeyo :</p> <ul style="list-style-type: none"> ◆ Waxa jira qiyaaso kala duwan oo lagu qiimeeyo fikradaha am dhaqamada. ◆ Ujeedooyin gaar ah oo leh waxyaalo la qiimeeyo oo gaar ah. ◆ Kala duwani xag nololeed, fikradeed ama diineed. 	<p>Dhexgalka la xidhiidha wax la qiimeeyo :</p> <ul style="list-style-type: none"> ◆ (Fiiri) in mushkiladii aad sharaxeeda uula kacdo dhinaca qiyamka. ◆ U ogolow dhinacyadii in ay waxna isku waafaqaan waxna isku diidaan. ◆ Abuur goobo saamayneed meesha uu dhaqan kaliyihii ka taliyo. ◆ Raadi ujeedooyinka waaweyn oo dadku wadaago.
<p>Isku dhacyada xidhiidhka:</p> <ul style="list-style-type: none"> ◆ Caadifad xoog leh ◆ Fikrad qaldan ama qofka ku qufulan ◆ Xidhiidhka oo liita ama aan jirin ◆ Dhaqan khaldan oo soo noqnoqda. 	<p>Dhexgal xidhiidhka ku saabsan:</p> <ul style="list-style-type: none"> ◆ Xakamee erayada caadifada adoo raacaya qaab iyo xeer iyo isu imaatin, iwm. ◆ Horumari sidii loo sheegan lahaa dareenka adoo sharci ka dhigaya oo dajinaya geedi socodkii. ◆ Caddee dareenada waxaana aad samaysaa dareemo wanaagsan. <p style="text-align: right;">20</p> <ul style="list-style-type: none"> ◆ Horumari nooca iyo tayada xidhiidhka ◆ Jooji dhaqanka aan fiicnayn ee soo noqnoqda adoo badalaya qaabka ◆ Dhiiri dhaqanada fiican ee mushkilada lagu xalinayo.

DSHISKA Biriishyada

**Khariirada sababaha isku dhaca iyo siyaalaha suurtoogalka h ee loo guda galayo:
Waxa laga soo dheegtay geedi socodkii dhexdhexaadinta ee Christopher Moore (boga 27)**

QALABKA 5: UDUGA BILAABAYAASHA IYO TAMARGALIYAYAASHA.

Halkan waxa aad ku arki qaar ka mid ah bilaabayaasha iyo tamargaliyeyaasha, iyo malaha hadal furfuraayaasha, kuwaas oo maaweelo kuu noqon doona fiirana kaaga baahan. Waxa laga soo dheegay inta badan khibradii laga helay shaqadii badhtamaha iyo bariga Europe, halkaa oo tijaabo goobeed laga sameeyay, iyo tababaradii aqoon iswaydaarsiga tababarayaasha ee la xidhiidhsanaa buugaagtan iyo qaar kale. Waxana loo qorsheeyay in ay ceeryaamada tababarayaasha yareeyaan, iyaga oo si aan dhibaato lahayn uuga jeedinaya wixii mushkilad soo gaadhay kooxda maalintaa. Loomana liis garayn si gaar ah ama sida ay u kala muhiimsan yihiin ama caqligalsan yihiin.

A) **Bilaabe** : kan waxa loo isticmaali karaa in lagu muujiyo siyaalaha labada dhinacba u guulaysanayaan ama muujinta noocyada kala duwan ee isku dhac maaraynta, iyada oo laga xiganayo shantii qaab hawleed ee Kenneth Thomas ee ku xusnaa qaybtii koowaad ee buugan.

Kaydka loo bahanyahay: hal qalin, hal waraaqa oo ah nooca (A-4) oo la siiyo labadii qof ee koox ahba. Una diyaari waraaqo yaryar qof kasta. Nus ku qor erayga “Maroodi” nuska kalana erayga “Guri”.

Geedi socodka: ka qaybgalayaashu ha yeesheen kooxo laba laba qof ah. Koox kasta sii qalin kaliya iyo waraaq (A-4) ah oo kaliya. Mid kooxda ka mid ahna waraaqadii yareyd ee “Maroodigu” ku qornaa sii, ka kalana tii erayga “Guri”.

Waxa aad fartaa in labada sawirba ay waraaqda (A-4)ta ku sawiraan, iyada oo ay sidan samaynayaan: qofna yaanu tusin una sheegin, qofka kale waxa lagu yidhi sawir. Labaduba waa in ay qalinkaa markasta haystaan. Waa in ayna afka ka wada hadal. Waa in ayna qalinka warqada kor uuga qaadan waxana la siinayaa shan daqiiqo si ay labadii sawir u sawiraan. Tilmaamahan waraaq caadi ah ayaa dhammaan loogu qori karaa si ay u arkaan.

Marka ay shanta daqiiqo dhammaadaan, jooji hawsha, koox kastana wixii ay qabatay war bixin haka keento, iyo sida ay u wada shaqeeyeen. Bal ha

DSHISKA Biriishyada

wadaagaan sawirkoodii si loo eego loogana hadlo fikrada isku dhaca ee labada dhinacba guulaysanayaan, ama dhinac guulaysanayo dhinacna khasaarayo, ama istaraatiijiyadii Thomas ee wax wada qabashada ahayd, iyo tartankii iyo istaraatiijiyoyinkii kale ee ku haboonaa halkan.

B) Tamargaliye: layligani waxa uu u baahanyahay nooc kubad ah. Hadii aanad hayn kubad ama kubado badan oo hareerahaaga (wareegaaga) tababare ahaan lagu tartamayo, waa in aad carartaa oo aad qaar soo iibisaa. Maxaa yeelay waa qalab aad loogu baahanyahay, gaar ahaan marka waxbarashadan oo kale la qabanayo.

Geedi socodkii: waa mid fudud. waydii ka qaybagalyaasha in ay goobo sameeyaan oo kubada qof loo tuuro, waxa la odhanayaa qofkaa sheeg fikrad ama wax muhiim ah oo maanta la bartay, ama wiigan, wax uun sheeg, qofkaasina kubada mid kale ayuu u tuurayaa sidaas ayaanay ku soconaysaa ilaa dhammaan ka qaybgalayaashii ay fursad u helaan in ay macluumaadka wax ku daraan (qofba wax sheegayo). Layligan fududi waxa uu leeyahay shaqooyin aan tiro lahayn oo aad geedi socodka ku biirin karto, isticmaal malahaaga iyo khibrada kooxda si kubadaa hawsheedu u socoto.

C) Kani waxa uu noqon karaa bilaabaha fiican ee maalinta labaad, ama mid tamargaliya ah marka kooxda tamarteedu ay halka u hoosaysa gaadho. Samee goob cid kasta koobtay ka qaybgala kastaa isku dhaca ayuu wax ka tilmaamayaa hadal la'aan waxaana aad fishaa in dadkaasi qaarkood oo bulshaawiyiin ihi ay bixiyaan jawaabo dhawr ah.

D) Bilawga tamargalinta kubadaha badan: waxa aad halkan ku arki layli la xidhiidha geedi socodka dhexdhaxaadinta ama gorgortanka kaas oo la tacaalaya dhinacya badan. Waxa aad heli sawirka marka aad sii akhrido sida geedi socodku u muuqanayo.

Kaydka loo baahanyahay: Kubada badan, biibiile la buuxiyo, sharaabaado gaboobay oo waxyaabaha hadh hadha laga buuxiyay, ama wax uun lagu guray.

Geedi socodka : Mar labaad samee goobo koobaysa ka qaybgalayaasha jooga dhammaan. Hawl fudaydiyihii ayaa kooxda u sheegaya in kubada ama wax la mid ah loo tuuro sida dadku iskugu xigxigaan markasta, si loo cadeeyo halkan, qofku waxa uu kubada ka helayaa qof kaliya markasta, waxa uu isna kubada u gudbinayaa isla qofkii uu kubada markii ugu danbeysay u gudbiyay.

Gudbinta kubada u horaysaa way soconaysaa ilaa qofkasta oo goobadaa (wareega) ku jira ay soo gaadho, markaa ayuu hawl fududeeyihii keenayaa kubada badan oo geedi socodka ku saabsan, marka hore si aayar ah, marka danbana si dagdag ah, dhab ahaan geedi socodku marka dambe wuu

DSHISKA Biriishyada

burburayaa, wax qiima leh ayaana dhaca oo tusaya waxa ka iman kara gorgortanka ama dhexdhaxaadinta dhinacyada badan.

Halkan eegmadii qofku waxa ay ku soo ururaysaa qofka uu kubada ka qaadanaayo iyo ka uu u tuuraayo. Waxa dhacaysa in dhammaan dadkii kale oo aanu markan ku xidhnayn uu lloobo waxa ku jira war is waydaarsi dhacaya oo in yar uuni dareemi karto. Kooxda tayadeeduna geedi socodkan xad ayay leedahay. Halkaa ayaa qof fudaydiye ihi uu ku soo dhextuurayaa sharaabaad gaboobay ama biibiile labuuxiyay markaa ayuu dhaqdhaqaaqii is badalayaa. Ka qaybgalayaasha qaar ayay dhib ku noqonaysaa in ay maareeyaan is badalka. Waad heshay sawirkii. Waa layli tusi kara dhaqan badan oo qofka soo mari kara marka uu ku jiro gorgortan ama dhexdhaxaadin dhinacyo badan ah.

E. Hadal furfuraha dadka arinka bilaabaya: layligan waxa loo qorsheeyay in uu caawiyo kooxda si ay isu bartaan bilawga aqoon is waydaarsiga.

Kaydka loo baahanyahay: waxa kaliya ee loo baahanyahay waxa weeye ka qaybgalayaasha oo hela dhul balaadhan oo furan.

Geedi socodkii : tababarihii wax sahlayay ayaa waydiinaya ka qaybgalayaasha in ay kooxo ugu ururaan meelo kala duwan oo qolka ah iyaga oo cuskanaya sidan: meelaha ay ka kala yimaadeen dhul ahaan (waxa aad sawirtaa in dhulka qolku yahay khariirad balaadhan oo gobolka ama dalka ah), ama meelaha ay ka shaqeeyaan (waxa dhici karta in la siiyo goobo kala duduwan ururada kala jaadjaadka ah), ama khibradooda dhexdhaxaadinta, tababarka, ama si uun, iyo xogkasta oo aad dareemayso In ay arinta la xidhiidho ama wax soo jiidan karto ama labada arinba laga helikaro.

Marka dhawr wareeg oo arinkani dhaco, waxa aad waydiisaa kooxaha yaryar ee uugu danba ururay in ay waxooga iska weeydiiyaan waxa ay ka filayaayn barnaamijkan iyo in ay u diyaargarobaan in ay u gudbiyaan wixii ay gaadheen dadka kale.

Soo koob natiijadii guud ee layliga si arinkan loo xidho:

F) Qof kale oo bilaabaya fikradaha dhinac kastaa uu guulaysanayo, ama dhinacna guulaysanayo dhinacna khasaarayo?

Kaydka loo baahanyahay: nacnac badan.

Geedi socodka: waxa aad ka qaybgalayaasha ka codsataa in ay sameeyaan kooxo laba laba qof ka kooban. Waxa aad u sheegtaa in ay galayaan shaqo kooxeed halkaa oo qof kastaa gaar ahaantii laga abaalindoono shaqada fiican ee uu qabto, shaqada fiican waxa lagu micneeyay waa in ay iyagu ku guulaystaan in suulkoodu dusha maro, marka uu dhaco tartan ciyaareed suulka

DSHISKA Biriishyada

dusha la marinayo, waxa aad koox kasta u sheegtaa in ay gacmaha u qabsadaan si ay labadooda suul dusha u maraan oo diyaar u noqdaan in suulalka qofka kale kuwoodu ka sareeyaan. Tilmaan kale oo aad muhiim u ahi waxa weeye: ma wada hadli karaan labada qof! Waxa aad siisaa (15) ilbidhiqsi si tartanka ay u dhammeeyaan.

Jooji tartankii suulka, oo xaga qolka u dhaqaaq waydii inta qof kastaa uu suulkiisii dusha kamaray kii saaxiibkii, markaa ku abaali qofka nacnicii badnaa. Malaha shaglaydhka “Belgian” abaal gud kaagu noqon maayo! Kooxaha qaar ayaa markiiba aqoon sanaaya faa’iidooyinka wax wada qabsiga si labadooduba ay u guulaystaan. Qaar ayaa aad u tartamaya oo tamardhac ku imanaysaa.

DSHISKA Biriishyada

QALABKA 6: URURINTA MACLUUMAADKA ISKU DHACA.

Ujeedada waxbarashada: in xirfad loo yeesho sidii loo qorsheyn lahaa habab macluumaadka looga soo ururinayo isku dhaca inta aan xalintiisa la gudagalin.

Waqtiga loo baahanyahay: 90 ilaa 120 daqiiqo.

Kaydka loo baahanyahay: xaalad jirta oo layligan gabagabadiisa lagu xusay.

Geedi socodka:

1) Si nidaamsan in macluumaadka iskudhaca loo soo ururiyaa waa macquul fikrad ahaan, inta badana ficil ahaan dhinacyadu way iska hilmaamaan, iyaga oo ku dagdagaya sidii xal murankooda ay uugu heli lahaayeen. Shaqada u mihiimsan ee layligani waxa weeye sidii loo heli lahaa xirfado lagu fahmo su'aalaha la iswaydiinayo iyo in la diyaariyo habab lagu ururiyo xogta iyo fikradaha ku saabsan isku dhaca inta aan la galin waqti iyo awood sidii isku dhaca loo xalin lahaa.

Ka qaybgalayaashu waxa ay u shaqaynayaan kooxo yaryar oo shan ilaa sideed ka kooban (midkiiba) si ay u diyaariyaan geedi socod xogta iyo macluumaadka lagu ururinayo oo u suurto galinaya in ay fahmaan dabiicada isku dhaca xaafada ka dhacay inta aanu "faraha ka bixin" .natiijada istaraatiijigan xaqiiqa raadiska ihi waxa ay noqonaysaa aas-aaska istaraatiijiyada arinka lagu guda galayo, si dadkii xaafada daganaa looga caawiyo khilaafaadkoodii in ay xaliyaan.

Shaqada u horraysa ee tababara ahaan lagaa rabaa waxa weeye in aad bixiso dood gaaban oo la hagayo oo ah xaqiiqo raadis iyo baadhitaan. Malaha sida u dhibta yar ee diyaarinta hawshani waxa weeye in loo noqdo buugii "Dhiska Biriishyada iyada oo lamarayo tubta qorshaynta ka qaybqaadashada ". Marka aad heshid qoraalka rasmiga ah ee "qiimaha leh" eeg cutubka lixaad, halkaa oo aad ka heli koox su'aalo ah oo la waydiinayo (dadka) si mushkiladda loo fahmo, iyo cutubka todobaad si loo helo sharax waafi ah oo talooyinka xaqiiqa raadiska iyo macluumaad ururinta ku saabsan.

Waxaa muhiim ah lix arin oo guud oo la kala dooran karo marka la ururinayo macluumaadka xaalad la mid ah ta layligan lagu sheegay. Waxana weeye: cid waraysi, su'aalo waydiin, labadaa oo isku jira, baadhitaan qoraaleed, eegid toos ah, khibradii kooxda, aqoon iyo malo maskaxeed.

DSHISKA Biriishyada

- 2) Doodan la hagayo ee dhibaato baadhista iyo xaqiiqo raadinta ahi, waxa isla markaaba ka dambeynaya in ka qaybgalayaashii loo qaybiyo kooxo 5 ilaa 8 xubnood ah si ay u sharaxaan wajiyada ay isticmaalayaan si ay si fiican uugu fahmaan isku dhicii inta aanay dhicanyadii isu keenin si loo maareeyo khilaafaadkoodii.

Hawshoodani waa laba: in ay eegaan xogta dheeraadka ah ee ay u baahanyihiin si loo xaliyo isku dhacan isa soo taraya iyo si ay u eegaan qalabka xaqiiq raadiska ah ay adeegsanayaan si xogta loo helo.

Waxa lafilayaa in ay ku soo daraan qalab kala duduwan oo wax lagu qiimeeyo, kan oo qayb ka ah qorshahooda guud ee wax lagu qiimaynayo. Hawshani waxa ay qaadanaysaa 45 ilaa 60 daqiiqo waxa aad dareensiin kartaa khariiradii Moore ee waxa dhaliya iskudhaca ku saabsanayd, tan oo ah qalab lagu ururin karo fikradaha ku saabsan xaqiiqada ay u baahanyihiin in ay ururiyaan oo ah talaabooyinkii ugu horeeyay xalinta iskudhaca la baadhayo.

Qaar su'aalaha ka mid ah oo ay jawaabo u raadinayaan waxaa ka mid ah:

1. Waa maxay arimaha isku dhaca xudunta u ahi?
 2. Waa ayo cidda ku jirtaa, sidee ayayna uugu jirtaa?
 3. Intee ayuu isku dhacu socday?
 4. Maxaa xalintiisa ilaa imika laga qabtay?
 5. Maxay natijadu noqonaysaa haddii la waayo si isku dhaca loo xaliyo?
- 3) Marka kooxaha yaryari ay dhammeeyaan hawshan, waxa aad waydiisaa in ay dib u kulmaan si layliga looga doodo. Koox kasta oo yar waa in la waydiiyaa in ay qoraal ku keenaan macluumaadkooda guud iyo istaraatiijiga xog ururinta. Wad dooda adoo waydiinaya su'aalo ay kuwa soo socdaa ka mid yihiin si aad u dhiiriso aragti iswaydaarsiga:
- o Waxyaalaha kooxuhu soo bandhigeen, maxaa cad ee ay iska shabahaan markii kooxuhu wax qiimaynayaan?
 - o Waa maxay waxa muhiimka ah ee ay ku kala duwanyinhiin ee aad aragtay?
 - o Maxaad is badalo ku samaynaysaa sida kooxdaadu wax u qiimayso adoo eegaya waxyaalaha kooxaha kala duwani soo bandhigeen.
 - o Maxay qiimo leedahay xaga aragtidaada in la isticmaalo ururinta macluumaad habaysan inta aan la guda galin isku dhac xalinta?

Xaalad baadhitaanka waxa laga heli karaa bogaga soo socda.

Xaaladan baadhitaan waxa ay hodan ku tahay waxbarashooyin kale oo suurtagal ah kana shisheeya hawlaha xaqiiqa raadinta ah ee kor lagu murtiyeeyay.

Waxa aad waydiin kartaa ka qaybgalayaasha aqoon is waydaarsiga bal waxa dhici kara haddii aan talaaba laqaadin. Shaki la'aan waxa kordhaya suurogalka isku dhaca. Tusaale ahaan gawaadhidi gaboobay ayaa la dhigay meel kasta oo ka mid ah goob cusub oo biraha gawaadhida burburtay lagu iibiyo, gawaadhida waawayn oo jimcayowga iyo maalmaha fasaxa ah imanaya, dayrarka oo la dheereynayo, ay wax ilaalisa, burburin hanti guud, dad badan oo cusub oo yimaada iyowaad aragtaa sawirka.

Halkan waa fursad lagu baadhi karo sida isku dhacyadu u xumaadaan.

Bal ka fikir in aad galiso xaalad baadhitaankii mustawa waxbarasho oo cusub, waa adoo ka qaybgalayaashaadii ka qaybqaadanayay isla kooxa hawleedka yaryar yidhaah diyaariya istaraatiijiyooyn lagaga hadlo khilaafaadyadaasi iyo isku dhacyada mustaqbalka imankara. Waxa aad ku dari kartaa sharax dheeraad ah xaalad baadhitaankii (Qaybta II) si loo kordhiyo tayada ay ku iman karto barashada diyaarinta istaraatiijiyooyn mushkiladaha lagu xaliyo. Tusaale ahaan, waxa aad kusoo dari kartaa war ku saabsan: riboodhka booliska, shirar la qabtay, kala duduwanida da'ada, tirada caruurta aan gaadhin da'adii iskuulka, wax qabadkii dawlada hoose ilaa taariikhdan, heerka shaqo la'aanta magaalada, tirada dadkii goobta ku raagay oo la barbardhigay kuwa cusub iyo waxyaabo kale.

Waxa aynu hore u sheegnay buuga tababarka ee "qorshaynta ka qaybqaadashada" oo ah qayb ka mid ah taxanahan. Waxa ku jira layliyo tababareed oo aad isticmaali karto si aad ka qaybgalayaasha u siisid khibrad mushkilad xalin ah, iyada oo la adeegsanayo siyaabo khilaafaadka lagu xaliyo oo si toos ah ula xidhiidha mabaadiida iyo hawlaha maaraynta.

BAADHITAAN XAALADEED: ARIN XAAFADEED!

Xaalad Isku Dhaca Oo Doonaysa Faham Iyo Xal

Waxa aad ka mid tahay machad samaynaya baadhitaan bulsho oo ku yaal goob uu ka socday isbadal bulsho iyo dhaqaale oo dhakhsa ihi tobankii sanadood ee u danbeeyay, ama mudo intaa ka badan. Waxa kooxdaada laga codsaday in ay taageero u fidiyaan magaalo yar oo 80km jirta oo xiisad isa soo tareysaa dhex taal muwaadiniinteeda. Waxa dhawaan dhacay iska hor imaadyo xunxun. Duqa magaaladu waxa uu leeyahay waan fahmayaa waxa isku dhaca dhalinaya waxase loo baahanyahay dhugasho qof dibada ah oo si dhab ah oo

DSHISKA Biriishyada

aan caadifad lahayn arinka u eega. Magaaladan oo ay dagan yihiin ilaa (10,000) oo qof waxay u ahayd suuq iyo xarun adeeg goob beeralay ah, hasa yeeshee beero badan oo ku xeernaa imika waxba sooma saaraan, hoos u dhaca wax soosaarka beeruhuna waxa uu saameeyay guud ahaan dhaqaalihii. Waxa ka jira shaqo la'aan badan magaalada iyo miyiyada ku xeeran.

Duqu markii uu sharaxay xaalada isku dhacyadan u danbeeyay waxa xudun u ahayd goob gaar ah oo magaalada ka mid ah oo leh guryo la daganyahay. xaafadaa ay isku dhacyadu u badnaayeen waa meel gabawday oo la daganyahay oo guryo dhawr ihi banbanaanyihiin, qaar guryaha ka mid ahna dad lacag leh oo dhul leh oo aan daganayn ayaa kiraystay oo ka kireeyay qoysas danyar ah oo dhawaan ka soo guuray goobo agagaarka magaalada ah.

Xaafadu waxa ay ku taal dhexda laba laagood oo ku darsama wabi wayn oo mara xudunta magaalada, Dhulkaa rayska ah ee u dhow laagaha dadka xaafada ayaa isticmaali jiray si beera yaryar oo guryaha ku yaal wax ay ugu beertaan. Waxa sii yaraaday dadkii hore u dagnaa ee wax beeranayay, markaasi ayay gabiyadii laagahaasi isu badaleen meelo qashin qub ah. Dadka dhawaan guryaha kireystay qof ka mid ah ayaaba soo jiiday gaadhi gaboobay oo dhigay xaga dambe ee guriga uu galo. Waxa laysla dhexmarayaa in uu ka dhigayo meelo biraha gawaadhida burburtay lagu iibiyo, maxaa yeelay waxa aad moodaa in wax qaynuun ah oo u diidayaa aanu jirin.

Qoysaskii hore u daganaan jiray waxa ay goobta daganaayeen jiilal (da'o) badan waxana ay ku faanaan in ay ilaalin jireen dhulkooda iyo goobaha ku xeeran ee banaan si ay u noqoto meel nadiif ah oo hawo fiican. Hase yeeshee qaar badani maanta waa da' oo ma, hayaan tamartii ay ku ilaalin jireen dhulkooda sidii baryihii hore. Waxana ay ka xunyihiin isbadalkan xaafada ku yimid. Dadkii hore u daganaa xaafadu dhawr goor ayay ashkato u gudbiyeen booliska iyaga oo ka cabanaya jaararkooda cusub qaylada iyo sawaxanka ay samaynayaan, iyaga oo aan danaynayn meelaha ay dagan yihiin iyo daryeelka dhulka banaan, iyo caruurtoodii oo ku ciyaaraysa goobihii dadkaa hore lahaayeen. Waxa uu u sheegay qof dadkii hore ka mid ihi madaxii kooxda baadhitaanka:

“Anigu fahmimaayo sida dadku sidan oo kale uugu noolaanayaan ! ma ixtiraamayaan waxa dadka kale leeyahay, caruurtoodu si bilaa tarbiyad ah ayey jidadka ugu ciyaarayaan. Waxa ay ku qabanayaan xaflado balbalaadhan dhulka guryahooda dabadiisa ah oo cid kasta oo goobta dagani imanayso waxa ay ku tuuraan qasacadaha ay wax ka cabaan iliiladaha, qashinkoodana gabiyada ayay raaciyaan. Maxay ugu noqon waayeen meeshii ay ka yimaadeen?”

Inta badan dadka dhawaan xaafada dagay waxa ay ka soo jeedaan isir gaar ah oo leh qaab nololeed ka duwan ka ay leeyihiin dadka goobtan hore u daganaan

DSHISKA Biriishyada

jiray. Dadka cusubi waa bulshaawiyiin, jecel raashinka basbaaska iyo kulkulayka leh kaasi oo jaararka qaar xataa urtiisa ka cawdaan waxana ay ku caweeyaan xaflado ay ku raagaan xili jaararkoodii ay seexdeen waxana ay wax ka soo saaraan iibinta alaabooyin iyo adeegyo ay dhulkan keeneen oo laga keenay dalal kale. Gawaadhidooda waawayn ayay joojiyaan jidad cidhiidhi ah oo xaafada ku yaal maalmaha fasaxa ah ee wiiga, taasi oo iyana dadka jaarka ah ka cadhaysiisay. Arinkan ayaa ka mid ah waxyaalihii qof ka mid ah baadhayaashu uu ka ogaaday markii u huraysay ee xaalada baadhitaankeeda la bilaabay. Qofkaa wax baadhayay waxa uu dadkii howsha kula jiray u sheegay in ay arimahani ay yihiin uun nabarka halkiisa sare. Hadii aan arinkana dhakhsa wax looga qaban oo khilaafaadka ka jira xaafadan la maarayn xaaladu-sida qofkaasi sheegay-way kasii dareysaa.

QALABKA 7: ARAGTI ISWAYDAARSI.

La taliye
Safar

Tilmaame socdaal: Qalabkani waxa uu aad wax u ool u noqonayaa marka lagu isticmaalo xaaladaha qaar. Tusaale ahaan qoraaga qoladan u wayni waxa uu u isticmaalay aragti-iswaydaarsiga lagu xaliyo khilaafaadka kooxo saraakiil dawlada hoose ah oo ka kala yimid bulshooyin kala duwan oo khilaafaad waawayni dhexyaalaan oo danaynaya in ay hagaajiyaan xidhiidhka shaqo ee dhexdooda yaal waxa wayn ee meesha yaalay waxa weeye iyaga oo jecel in ay talaabo ficil ah qaadaan.

Waxana uu arkay (qoraagu) in uu kani yahay qalab wax ku ool ah oo gudaha ururada ay ka jiraan khilaafaadka waawayni lagu ismticmaali karo, khilaafaadkaa oo wax soosaarkii iyo nafsiyadii saamaynaya dhamaan dadka isku dhacu taabtay.

Hadii uu qalabkani sidaa wax u tarayo, maxaa looga baahanyahay socdaal tilmaamaha? Ma aha noocii layliga ee ka shaqaynayay xaalada khayaali ah, sida xaalada baadhitaanka ee qalabka 6 lagu xusay.

Dhab ahaantii waxa la isticmaalay markii buuga tijaabo goobeedka lagu samaynayay, waxoogaa burbur ahina wuu ka yimid.

Hase yeeshee geedi socodkii aragti – iswaydaarsigu waxa uu noqday mid tayo badan marba marka ka danbaysa markii lagu isticmaalay xaalado ay labada dhinac ee isku dhacu rabaan in ay qaadan talaabooyin wax dhisid ah si ay khilaafaadkoodii u xaliyaan. Waxana aanu kugula talinaynaa in aad isticmaasho marka aad haysato macmiil (dhinacyo) dhammaan nidar u galay in khilafaadkooda ama isku dhacooda xal u raadsadaan.

Qalabka 8aad: ee kan ku xigaa, waji ahaan wuu shabahaa kan, markaa eray ama laba aynu ka nidhaahno inta aynu bixinayno tilmaamahan socdaalka.

Gorgortanka kaalintu waxa weeye qalab la isticmaalo marka la isku seegan yahay fikrado ku saabsan waxa ay dad ama kooxo dad ihi ka qabanayaan xaalad wax qabasho ku wajahan. Fikradaha ayaa loo badalay ficilo kuwaas oo sii adkeeya xaaladii.

Sida qalabka aragti iswaydaarsiga, waxa ay tani aad uuga shaqaynaysaa xaalad dhab ah, in kasta oo ka qaybgalayaasha tababarku ay habka kaalin is waydaarsiga jili karaan si ay u bartaan isticmaalkeeda.

Marka aynu sheegnay sida ay muhiimka u tahay in lagu isticmaalo qalabka 7 iyo 8 xaaladaha isku dhaca ee dhabta ah oo aan ahayn fadhiyo xirfado lagu dhisayo oo goob aqoon iswaydaarsi ah, hadaba qalabka lagu ban dhigayo qalabadaasi waxoogaa ayuu sidaa ka duwanaanaayaa .

Ujeedada waxbarashada : si dadka iyo kooxaha looga caawiyo in ay xaliyaan khilaafaadkooda una xaliyaan mushkiladahooda iyaga oo isticmaalaya iswaydaarsiga aragtiyaha ay iska qabaan, dadka kalana ka qabaan

Waqtiga loo baahan yahay : iyada oo la eegayo adayga khilaafaadka dhex yaal kooxaha isku dhacay, hawshani waxa ay qaadan kartaa maalin dhan .

DSHISKA Biriishyada

Qorshee waqtigaaga adoo eegaya waxa la ogyahay iyo waxa suurta galka ah adoo xusuusanaya in aad la shaqaynayso dad danaynaya una nidar galay in xidhiidhkooda isbadal fiican ku sameeyaan.

Kaydka loo baahan yahay: layligani waxa uu ku xidhan yahay dhinacyada isku dhacay adoo samaynaya liis fikrado iyo xog ah oo ku saabsan xidhiidhkooda shaqo. Waxana aad u baahan doontaa waraaqaha waawayn ee la rog-rogo, sabuurad, qalimo wax lagu calaamadiyo, “ shariid” xabag ah ama xabag kale, si midhaha awooda la bixiyay loo soo ban dhigo oo ay u arkaan dhammaan ka qaybgalayaasha layligu. Waxa kale oo aad u baahantahay laba qol oo kala duwan, si labada dhinac ee iskhilaafsani ama isku dhacay si xor ah xubnahooda uugula hadli karaan si liisaskooda u diyaarsadaan.

Waxa kale oo aanu rumaysanahay in loo baahanyahay laba la taliye-sahle oo layliga soo gala si labada kooxoodba u haystaan cid caawisa inta ay shaqadooda gudanayaan iyaga oo kooxo goonigoo ah.

Geedi socod:

- 1- **Baahida loo qabo shaqo gogol dhig ah shirka hortii:**Geedi socodka dhabta ah ee aragti **iswaydaarsigu** waa mid fudud Waxa ka mid ah iyada oo ay dhex marto wax curin iyo iswaydaarsi fikradeed ama xogeed dhinacyadii isku dhacay. Isla mar ahaantaa waa geedi socod murugsan maxaa yeelay waxa arinka ku jira dad iyo kooxo ama ururo uu nooc isku dhac ihi dhexyaal. Iswaydaarsiga dhabta ah ee aragtida waxa caadi ahaan hormara shirar taxana ah oo hawlgalid ah oo dhex mara la taliyaha-hawl-fudaydiyaha ah iyo labada dhinac ee muujiyay in ay rabaan in ay isu yimaadaan si ay uuga shaqeeyaan khilaafaadkoodii.(eeg buuga qorshaynta ka qaybqaadashada si aad u aragto tilmaamaha qeexan ee shirarka heshiiska hawl galinta ee dhexmara la taliyaha iyo macmiilka). Marka ay labada dhinacba waafaqaan in ay isu yimaadaan, waxa weeye in aad samayso goob kulan oo dhex ah dadkana raaligalisa halkaa oo ay ka dhici doonaan fadh iyada aragti-iswaydaarsiga iyo mushkilad xalintu.
- 2- **Fadhiyo hawleedka:** marka hor dhaca la sameeyo ee lala yimaad layligii hadal bilowga, ugu sharax geedi socodka si qeexan dadka aragtiyaha iswaydaarsan doona. Marka la is waydiiyo su'aalo lagu caddaynayo geedi socodka, waydii labada kooxood ee isku kacsan in ay kala gooni u shiraan si ay u diyaariyaan sadex liis oo ku saabsan fikradaha xidhiidhka labada kooxood dhexdooda ah. Qaybtan geedi socodka ka mid ihi waa mid waqtiga cunaysa. Markaa waxa aad waydiisa in ay war kugu soo celiyaan saacad gudaheed, waxa se aad u diyaar garowdaa in aad kordhiso hadii loo baahdo.
- 3- Hawshooda marka ay gudanayaan iyaga oo ah laba kooxood oo kala gooni ihi waxa weeye in ay diyaariyaan jawaabaha sadexdan su'aalood:
 - ❖ Sidee ayaynu nafteena u aragnaa inaku marka la eego khilaafadka ina dhex yaal kooxda ama ururka kale?
 - ❖ Sidee ayaanu kuu aragnaa, hadii aad tahay kooxda aanu isku dhacnay?
 - ❖ Sidee ayaanu isleenahay waad noo aragtaa ?

DSHISKA Biriishyada

- 4- Dib u kulansii labada kooxood waxana aad waydiisaa in ay bandhigaan jawaabahooda liiska hore, sida ay naftooda u arkaan. Waydii oo kaliya su'aalo aad rabtid in ay wax kuu caddaadaan, hala doodin, haburin waxa ay maqleen. Wad aragti iswaydaarsiga, koox kastana ha bandhigto liiskooda labaad, su'aalihii wax caddaynta ku xigsii iyo ugu danbayntii waa in koox kastaa soo bandhigaan liiskii ugu danbeeyay ee fikradaha ahaa.
- 5- Talaabada xigtaa geedi socodkan waxa weeye in kooxuhu liiskooda is garab dhigaan oo eegaan meelaha ay iska waafaqsanyihiin. Waxa doodaa xigaya in si ballaadhan loo eego fikradaha laysku diidan yahay sababtu waxa ay doonto ha ahaatee. waxa laga yaabaa in ay ka dhalatay is faham la'aan, xog qaldan, ra'ayi qofka ku qufulan, eexasho, ama sababa kale. Waxana ay kuwaasi u baahanyihiin in si ballaadhan loo baadho waxa yaala meesha ee dhalinaya in ay noqdaan arimahaasi ilaha khilaafka keena ama isku dhaca.
- 6- Bandhiga iyo doodaha kadib, waxa aad waydiisaa kooxaha in ay kala gooni u kulmaan mar kale, markan waxa aad waydiisaa koox kasta in ay curiyaan laba liis oo cusub oo lagu qorayo waraaqaha bal ballaadhan ee laalaabma :
- A) *Anaga oo eegayna waxa aan ka baranay xog iswaydaarsigan, waxa aanu diyaar u nahay in aanu samayno wax yaalaha soo socda si ay nooga caawiyaan khilaafaadkayaga in aynu xalino.*
- B) *Iyo, waxa aanu kaa rabnaa in aad qabato waxan soo socda si aad inooga caawiso in aana xalino khilaafaadkeena.*

Waxa aad ku siisaa hawshan kooxaha ugu yaraan saacad, si dagana u kormeer si aad u hubiso in ay haystaan waqti ku filan oo ay hawlahaan ku dhammeeyaan. Xusuusnow in ay isku dayaan in ay gaadhaan heshiis ku saabsan arin kasta oo liiskooda ku jira oo ay "rabaan" ama "bixinayaan"

- 7) Marka ka qaybgalayaashu ay dib u kulmaan waxa aad waydiisaa riboodho labada kooxoodba, waxana aad siinaysaa waqti ku filan si loo caddeeyo arin kasta oo aan caddayn.
- Riboodhada ka dib. Waxa aad waydiinaysaa kooxaha in ay markale kala gooni u shiraan. Xiligan, waxa aad u sheegtaa in ay qaataan liiska kooxda kale waxa ay rabaan ku sheegteen, markaa waxoogaa daqiiqado ah ha go'aamiyaan jawaabtooda ku saabsan waxa kooxda kale iyaga ka rabto. Sadex waji oo wanaagsan oo ay ku jawaabikaraan waxa weeye:
- a) Tan si fudud ayaanu u fali karnaa; maba aanu garanayn in waxani yahay wax aad rabtaan;
- b) Waanu rabnaa in sidaa aanu yeelno, hase yeeshee waa haddii laydinka helo.....
- c) Taasi mayeeli karno maxaa yeelay.....

Sii kooxaha yaryar saacad kale si hawshan ay u dhammeeyaan.

DSHISKA Biriishyada

- 8) Marka ka qaybgalayaashu dib u kulmaan waa in qof afhayeen ah oo koox kasta leedahay qeexaa macluumaadka. Xiligan, ku dhiiri ka qaybgalayaasha in ay dhagaystaan oo ay waydiiyaan oo kaliya su'aalo ay wax caddayn ku raadinayaan.
- 9) Marka la sameeyo bandhigyadaa ee nuqdad (qodob) kasta oo aan la fahmin ama murugaysanayd la caddeeyo, waxa jira dhawr talaabo oo aad qaadi karto si aad u hubiso in nidar galkii ay qaadeen ay fuliyeen. Khibradayadii isticmaalka geedi socodkan aaanu ka helnay xaga habka gorgortanka ee loola tacaalo khilaafaadka iyo isku dhacyada suurta galka ihi waxa ay ahayd mid fiican. Inta badan, ka qaybgalayaasha "aragti iswaydaarsigu" iyaga ayaa la wareega geedi socodka marka halkan la gaadho waxana ay soo jeediyaan siyaalihii ay toos ugu wada shaqayn lahaayeen iyaga oo ah kooxo yaryar oo isku badhxan si ay u xaliyaan khilaafaadka qaybinaya.
- 10) Marka ay khilaafoodkooda xaliyaan, waa in aad sharaftaa nidar galkoodaa adoo siinaya taageeradii ay u baahnaayeen si si wada jir ah loo dhigo qorshayaal hawleed iyo istiraatiijiyoyin kormeer iyo qiimayn. Mar kale waxa aanu kugu celinaynaa in aad xigato buugii qorshaynta ka qayb qaadashada halkaa oo aad ka heli karto waxyaalo kugu filan oo kaa caawinaya sidii aad taageero u siinlahayd kooxaha si ay u diyaariyaan qorshayaashii hawlgalka iyo istiraatiijiyoyinkii kormeerka.
- 11) Noocyada caynkan oo kale ah ee khilaaf xalinta ah, iyo fadhiyada mushkilad xalintu waxa ay mudan yihiin abaal marin. Markaa waa in aad qorshaysaa qado ama xaflad bulsheed lagu xusayo waxaa ay fuliyeen.

DSHISKA Biriishyada

QALABKA 8: KAALIN KA GORGORTANKA

Xusuusin ahaan, qalabkan waxa loo qorsheeyay in lagu isticmaalo si loo caddeeyo kaalmaha iyo xidhiidhyada u dhaxeeya dadka, kooxaha, ama ururada la kulmay dhib xaga wadashaqaynta ah. Iyada oo qalabkan loo isticmaali karo aqoon iswadaarsiga xirfada lagu hormarinayo ee ku saabsan maaraynta isku dhaca iyo khilaafaadka, hadana waxoogaa bad-badal ah ayaa loo baahanyahay in tilmaamaha lagu daro si uu u noqdo mid la jaan qaada ujeedooyinkaaga waxbarasho.

Ujeedooyinka waxbarshada: si loo caddeeyo loona badalo waxyaalaha laga filayo kaalmaha iyo xidhiidhada dadka, kooxaha, kooxo hawleedka, ama ururada ay dhibi wada shaqaynta ka haysato.

Wagtiga loo baahanyahay: waxa ay ku xidhan tahay inta ay adagtahay kaalintaasi ee uu madmadowgu ku jiraa, waxase aad qorshaysataa waqti aan 180 daqiiqo ka yarayn si loo gaadho heshiis raali laga yahay.

Kaydka loo baahanyahay: waxa aad u baahan tahay goob dagan oo gaar ah oo ballaadhan si ay u deeqdo dadka aad la shaqaynayso, si aad kaalin ka gorgortanka u fuliso.

Way fiican tahay hadii la helo waxoogaa “foomam” ah oo ka qaybgalayaashu ku qoran karaan heshiishkooda ku saabsan sida ay u qorshaynayaan wada shaqayn tayo badan.

Tusaalooyin ayaad ku arki doontaa gabagabada sharaxa geedi socodkan.

Geedi socod :

- 1- Geedi socodka aanu rabno caddayntiisu waxa uu ka soo qaadayaa in aad gaadhay heer labadii kooxood diyaar u yihiin in ay isu yimaadaan iyada oo qof hawl fududeeyi ihi caawinayo si loo caddeeyo arimaha kaalmaha, masuuliyadaha iyo xidhiidhka. Iyada oo buugagan taxana ihi ku waajahan yihiin inta badan xidhiidhada ay ururada bulshadu(NGO/CBO) la leeyihiin dawladaha hoose, waxaanu qoraalkan u isticmaalnay in geedi socodka la qeexo. Waxa aad kartaa in aad jilayaasha badasho aanu ku isticmaalnay wax yaalahan sharaxa ah si ay ula jaanqaadaan haybta qolooyinka codsaday taageeradaada, si looga gorgortamo kaalmaha gaarka u ah, iyada oo u jeedadu tahay in la helo sidii si tayo leh loo wada shaqayn lahaa.
- 2- Waxa aad ku bilaabaysaa geedi socodka adoo yeelanaya dood la hagayo oo ku saabsan waxa geedi socodkan looga jeedo iyo waxa lagu xaqiijin karo kaalin ka gorgortanka, waxa aad halkan ku arki fikrado ku saabsan waxa fadhigan hordhaca ah lagu soo qaadayo.

DSHISKA Biriishyada

- Kaalin ka gorgortanku waxa weeye geedi socod isku jira oo dadkii arinka ku jiray ay ka gaadhayaan go'aan dhex ah kaalmahooda si ay si tayo leh u wada shaqayn karaan.
- Kaalintu halkan kuma koobna waxa ururka loo xilsaaray ee qeexan waxase soo galaya dhammaan waxa aan rasmiga ahayn ee layska fahamsanyahay iyo heshiisyada, waxyaalaha la filayo iyo wixii la diyaariyay ee isbiirsady ee sharaxaya xidhiidhka shaqada.
- Waxa ay farsamadu leedahay, dadka intooda badani waxa ay jecelyihiin in ay ka doodaan siyaalo ay iskula xidhiidhi karaan una wada shaqayn karaan, halkii ay ku jiri lahaayeen xaalad isku dhac oo aan la xalin, iyo khilaafaad iyo isfaham la'aan.
- Gorgortanku waxa uu leeyahay waxoogaa khatar ah. Ka qayb galayaashu waa in ay u furfuran yihiin is badalada ay rabaan in dadka kale ay ku sameeyaan dhaqankooda kaalin ahaaneed iyo suldadooda iyo masuuliyadooda, si hore loogu mariyo nooca iyo adeega xidhiidhkooda wada shaqaynta. Heshiisyada laga gaadho kaalin ka gorgortankan waxa la rajaynayaa in la ixtiraamo. Hadii taasi dhici waydo, xidhiidhkii wada shaqayntu intii hore waa uu ka sii xumaanayaa.
- Waxa jira xeerar muhiim ah oo lagu hubinayo in la helo geedi socod kaalin ka gorgortan ah oo guulaysta. Ugu horayn, ma aha sharci in aad dhinaca kale qodqodo dareemadiisa iyo caadifadiisa. Kaalin ka gorgortanku wuxuu ku saabsanyahay yaa wax cid ku sameeyey sidee ayaanu u sameeyay. Ta labaad, waxa laga filayaa dhammaan dhicanyada gorgortanka in ay daacad yihiin oo u furfuran yihiin xaga dhaqankooda iyo dhaqanka dadka kaleba oo ay nidar ku galaan in ay ku shaqeeyaan qeexid cusub oo kaalma ah, tan oo hagi doonta xidhiidhka wixii imika ka bilaabma.

Ta sadexaad: gorgortanku waxa weeye geedi socod laba haad ah. Wax marka aad ka codsato dhinaca kale, waxa la socda in dhinicii kale la siiyo wax badal ah. Ugu dambayn lama ogola dhaqano hanjabaad iyo cidhiidhi saarid ah, si loo gaadho heshiis loo dhan yahay oo ay ogalaadaan labada dhinacba.

- Heshiisyada lagu gaadho geedi socodkan gorgortanka waxa la rajaynayaa in lagu diyaariyo qoraal ahaan oo dhinacyadu dhammaan ogalaadaan.
- 3- Doodaa la hagayo ka dib ee cuskanaysa nuqdadaha imika uun la sheegay, waydii koox kasta oo la xidhiidha kaalinta laga gorgortamayo in waqti waxoogaa ah ay ku qaataan ka jawaabida weedho hawleedka soo socda. Iyada oo weedho hawleedkani ay milicsanayaan geedi socodka kaalinta laga gorgortamayo ee u dhexaysa hogaamada dawlada hoose iyo ururada bulshada, sida ururada aan dawliga ahayn (NGOs) iyo ururada bulshada (CBOs), waad badali kartaa erayada si ay u milicsadaan xaalado kale. Sida kaalinta laga gorgortamayo ee dhex taal kormeere iyo koox hawleed, kuwaas oo galay xidhiidh shaqo oo xumaaday, ama dhexda laba hoggaamiye waaxeed oo raba in ay si aad u taya badan u wada shaqeeyaan. Imika waxa aad halkan ku arki weedho hawleedkii aanu ku ballan qaadnay. Waxa looga jawaabi karaa qof ahaan, markaa ka dib waa la isu gayn karaa hadii ay jiraan qof in ka badan oo matalaya dhinacyada qorgortamaya, ama kooxda ayaa isu gaynaysa iyaga oo wada shaqaynaya.

Way wanaagsan tahay waliba hadii arimahaa lagu liis gareeyo waraaq caadi ah si dadku dhammaan ay mar kaliya u wada arki karaan. Tusaale ahaan:

DSHISKA Biriishyada

- Hadii adiga iyo urur kaagu arimaha soo socda aad u qabataan si badan ama fiican , taasi aniga iyo ururkayga waxa ay ka caawinaysaa in tayadayadu ay korodho.
- Hadii adiga iyo ururkaagu aad yaraysaan falitaanka waxa soo socda, amaba joojisaan falisteeda, waxa ay aniga iyo ururkaygaba taasi ka caawinaysaa in tayadayadu korodho.
- Waxyaalahan soo socda oo adiga iyo ururkaagu aa qabanayseen ayaa aniga iyo ururkaygaba caawiyay si aan u tayo badano, waxana aanu rajaynaynaa in aad adna wadi doonto falista hawshaa.

4- Marka dadka ama ururada ergadoodu ay dhammeeyaan qorshaha qabyada ah ee weedhahan, waxa aad ku tidhaa soo bandhiga halaga doodo eh. Goobtan geedi socodka ka mid ah, waxa aad ka rabtaa in ay u caddahay arimaha ay rabaan in ay ka gorgortamaan, ma aha inay wax uun ka hortagaan. Marka intaa la yidhi :waxa haboon su'aalo odhanaya: "waa maxay?, maxay sidaasi u dhacday? Iyo goorma? Weedho se looma baahna.

5- Waydii dhinacyada gorgortanka in ay doortaan arimo liiska ku jira oo ay si dhib yar u ogolaan karaan falistooda, ama joojin karaan, ama si kale oo duwan labada dhinacba u fali karaan xaga xidhiidhka si ay dhinac kasta uuga caawiso in ay tayo dheeraad ah oo wada shaqayna yeeshaan. Tani waa si dhakhso ah oo lagu heli karo guul iyo horumar xidhiidhka shaqo ah. Qoro inta ayna kaaga dhex lumin arimo ad-adag dhexdood oo talaabooyinka xiga ee geedi socodka laga gorgortami doono ah.

6- Goobtan kaalin ka gorgortanka waa in labada dhinacba aad tidhaa diirada saara arimaha soo hadhay ee iyaga aadka muhiimka uugu ah ee hore u marinaya iyaga tayadooda iyo waliba nooca xidhiidhkooda shaqo.

Sida caadiga ah gorgortamadani waxa ay u dhacayaan sidan "waxa aanu rabnaa in aanu qabano ...hadii aad adigu rabto in aad samayso ..." "ama , "sidaa ma samayn karno" maxa yeelay" siday doonto ha ahaatee waa in labada dhinac ay awoodaan in ay curiyaan waxyaalo cusub oo badal ah oo ka caawiya mid kasta in ay tayo bataan.

7- Gorgortanku waxa uu dhammaanayaa marka ay dhinacyadii ay dhammeeyaan wax kasta oo suurto gal ah si ay u hagaajiyaan xidhiidhkooda shaqo iyo wax ku oolnimada urur kasta iyo hoggaan kooda iyada oo la cuskanayo natiijooyinkii gorgortanada. Waa in aad qortaa heshiiskii adoo intaad karto si gaar ah wax u qoraya, waxana aad isticmaalaysaa foomka (warqada) lagu siiyay, amaba warqada kale (foom) oo aad ugu haboon labada dhinacba(qolaba).

8- Ku xidh gorgortanka adoo waydiinaya dhinacyada in ay milicsadaan khibradoodii

DSHISKA Biriishyada

HESHIIS LAGA GORGORTAMAY OO DHEXMARAY

_____ iyo _____

Waxa aanu u ogolaanaynaa si wada jir ah in aanu qaadano kuna shaqayno isbadalada ku yimid kaalinta wax qabashada ee hoos ku xusan:

anoo ergo ah matalaya _____ waxa aanu ogolnahay in aanu qabano waxan _____
(Ururka magaciisa)

1-

.....
.....
.....
.....

2-

.....
.....
.....
.....

3-

.....
.....
.....
.....

Anoo ergo ah matalaya _____ waxa aanu ogolnahay in aanu qabano waxan _____
(Ururka magaciisa)

DSHISKA Biriishyada

1-

.....
.....
.....
.....
.....

2-

.....
.....
.....
.....

3-

.....
.....
.....
.....
.....

...

DSHISKA Biriishyada

QALABKA 9: ISTARAATIJIYOYINKA ISKU DHAC MAARAYNTA.

Ujeedada Waxbarashada: in la kordhiyo fahamka shanta istaraatiijiyo ee iskudhac maaraynta iyada oo la cuskanayo tusaalihii Kenneth Thomas iyo goorta la isticmaalayo iyo goorta aan la isticmaalayn.

Waqtiga loo baahan yahay: 90 daqiiqadood.


Geedi socodka:

1. Ku bilow geedi socodka dood ku saabsan tusaalaha Thomas ee iskudhac maaraynta ee ku xusan cutubka 3 ee la socda “akhriyaha”. Ku liis garee oo sharax shantii istaraatiijiyadood waraaqaha balbalaadhan ee laalaabma kana fikir xaalada la yaqaan oo lagu caddeeyo mid kasta. Waxa aad tilmaamtaa in aanay jirin istaraatiijiyoyin sax ah ama khalad ah. Isticmaalka iyo haboonida istaraatiijiga waxa ay ku xidhan tahay nooca isku dhaca iyo waliba dhaqanka lagu isticmaalayo. Layliguna fursad ayuu u yahay ka qaybgalayaasha ay ku qiimaynayaan wanaaga iyo xumaha shanta istaraatiijiyadood iyada oo la cuskanayo khibradaha gaarka ah ee qofka iyo khibradaha ka qaybgalayaasha kale (ee weheliya).
 2. Waxa aad samaysaa shan koox hawleed, waxana aad u xilsaartaa koox kasta mid ka mida shantii qaab ee iskudhaca iyada oo laga soo xiganayo tusaalihii Thomas: tartankii, wax wada qabadii, isku tanaasulkii, diidmadii, iyo la jaanqaadkii. Shaqooyinkooduna waxa ay noqonayaan :
 - o Inay tilmaamaan xaalada ay istaraatiijiga isku dhaca ee loo xilsaaray ay ku haboontahay in lagu isticmaalo.
 - o Goorta aanay haboonayn in la isticmaalo, iyo
 - o Guud ahaan faa’iidooyinka iyo khasaaraha isticmaalka istaraatiijiga lagu maareeyo isku dhaca iyo khilaafaadka
 3. Kulmi ka qaybgalayaasha waxana aad waydiisaa koox hawleed kasta inay qoraan waxa ay gaadhaan. Ka samee dood faaiidada khariidadan fikradeed ee ku saabsan maaraynta isku dhaca khilaafaadka.
- 1 **Tartanka:** hal adaygnimo iyo dhaganaan iskaashi aan lahayn oo xooga saaraysa danaha gaarka ah adoo iska indha tiraya dadkii kale.
 - 2 **La qabsi:** dhaqan aan qofku wax ku dhaganayn, iskaashina ku dhisan oo uu ka tagayo danihiisii gaar si uu u raali galiyo danihii dadka kale.
 - 3 **Diidmo:** wax ku dhag la’aan iyo iskaashi la’aan oo aanu qofku dantiisana wadan danihii dadka kalena aanu wax ka qabanayn.

DSHISKA Biriishyada

- 4 **Wax wada qabsi** : hal adaygnimo iyo iskaashi isku jira oo xoogga la saarayo la shaqayntii dhinaca kale si loo fuliyo danahaagii iyo danihii cida kaleba.
- 5 **Isku tanaasul** (meel dhexe ah): waa meel dhexdhexaad u ah hal adaygnimadii iyo iskaashigii oo inta badan lagu magacaabo kala firdhinta khilaafaadkii oo loo raadinayo goob dhaw oo dhex ah.

Istiraatiijiyooyinka Isku Dhac Maaraynta Waxa la cuskanayaa tusaalihii Kenneth Thomas



DSHISKA Biriishyada

QALABKA 10: JILISTA KAALINTA GORGORTANKA.

Ujeedada waxbarashada: si loo helo tababar xirfadeed oo ku saabsan geedi socodka gorgortanka

Waqtiga loo baahanyahay: saacad ilaa saacad iyo badh, waanay ka badan kartaa iyadoo ku xidhan sida aad goosato in layliga aad u fuliso.

Kaydka loo baahanyahay: Nuqulo sharaxii baadhista xaalada oo la siinayo dhammaan ka qaybgalayaasha (qaybtii koowad), nushkhado (nuqulo) kaalmaha kala duwan ah oo la siinayo ka qaybgalayaasha raba in kaalmaha ay gutaan, iyo warqadii shaqada ee kaalinta goobjoogaha oo la siinayo kuwa kale.

Geedi socodka: qaabkan gorgortanka ah waxa loo qorsheeyay in ka qaybgalayaashu khibrad u yeeshaan fursada galitaanka gorgortanka maslaxada (danta) ku dhisan, iyada oo lagu dhiirinayo in ay iyaga oo xaalada eegaya soo hooyaan wixii u fiican ee la heli karo.

- 1- Dib u eeg cutubka shanaad ee akhriyaha, waxaana aad xusuusisaa ka qaybgalayaasha qaar ka mid ah nuqdadahii aasaasiga ahaa ee ku jiray gorgortanka mabda'a leh. Waxa aad tilmaamtaa faraqyada u dhexeeya baayacaada maslaxaadeed oo la barbardhigayo ka mawaaqifta. Kuwa gorgortankoodu cuskanayo mawqif waxa ay imanayaan sidii qaar dood wada. Waxa ay soo bandhigayaan arinkoodii, meel adag ayay istaagayaan, marka ay u baahdaana wax isla eegid ayay galayaan. Dadka uu mawqif gorgortankoodu cuskanayo inta badan waxa ay aduunka u arkaan wax laysku gaygaynayo (xisaab). Tusaale ahaan meel go'an uun bay ku wareegaan. Waxana ay arkaan in waxa qofka kale gorgortan kaa ku helo uu ka go'an yahay wixii ay heli lahaayeen.

Dhinaca kale marka qof gorgortankiisu yahay eegida maslaxada labada dhinac, waxa laga yaabaa in uu ka bilaabo mawqif, hase ahaatee waxa uu dhakhso uugu guurayaa baadhitaanka sababta khilaafkoodani u jiro. Marka la yidhaa maxaa keenay waxa eraygaasi furfurayaa in la eego "sidee ayaynu waxan meesha yaala u qaybsanaa" oo dhakhsa isugu badalaya geedi socod firfircoon oo mashkaladii lagu baadhayo oo xal lagu raadinayo, iyada oo laga shaqaynayo danta dhinacyada gorgortanka dhammaantood, oo aan la eegayn mawaaqifta gunta u taala ee ay milicsanayaan geedi socodka gabagabadiisa.

- 2- Waxa aad u dhisi kartaa layligan siyaabo badan adiga oo eegaya waqtiga aad haysato, tirada dadka aqoon iswaydaarsiga jooga, iyo waxa aad rabto in aad fuliso, haddii aad rabto si fudud in aad u tilmaamto waxa u dhexeeya gorgortanka maslaxada iyo ka mawqifka, waxaba ku filan jilitaanka kaalin kaliya oo la raaciyoo dood lahayo oo la eegayo wixii ka dhacay xaaladii kaalin jilitaanka. Haddii aad rabto in aad fursad siiso tiro badan oo ka qaybgalayaasha ah si khibrad toos ah gorgortanka ay ugu yeeshaan, waxaad u qaybin kartaa tirada guud ee kooxda

DSHISKA Biriishyada

sadex kooxood oo yar yar, iyada oo laba ay falayaan kaalmihii is baayacaada midna uu goobjooge noqonayo.

Adoo maleenaya in jidka hore ee imika uun la sheegay aad qaaday, u qaybi ka qaybgalayaashii kooxo yaryar oo sadex ah waxana aad tidhaa go'aamiya cida qaadanaysa kaalinta qofka (Maroni) ama magacaad doonto ku sheeg qofkaa iyo qofka (Swartz) oo noqonaya goobjoogihii. Waxana aad siinaysaa dhammaan nuskhadihii sharaxayay gorgortanka waxana aad waydiinaysaa in ay qaataan mar amaba laba jeer si ay u akhriyaan. Waydii su'aalo aad ku doonayso wax caddayn.

- 3- Dhiib labadii kaalmood iyo goobjoogaha su'aalihiisii waxana aad u sheegtaa in ay raadsadaan meel dagan oo ay ku qabtaan gorgortankooda. Waxa aad waydiisaa in ay akhriyaan sharaxyadii kaalinta oo ay qaataan waqti ah labataan ilaa sodon daqiiqo si ay u dhammaystiraan geedi socodka
- 4- Kulan u qabo kooxihii yaryaraa, waana in goobjooge kastaa uu riboodh ka bixiyaa heshiiskii ay labada gorgortame gaadheen iyo wixii ay rabaan in ay ka yidhaahdaan geedi socodka.
- 5- Ku gabagabee fadhiga in ay ka qaybgalayaashu si wada jir ah uga fikiraan sifooyinka sharaxaya waji mabda'a ku dhisan oo gorgortanka loo maro. Una diyaar garaw in aad buuxiso wixii ay nuqdado halmaamaan.

DSHISKA Biriishyada

XAALAD BAADHIS: DARYEELKA XARUNTA XANAANADA MAALINIMO EE XAAFADDA: XAALAD LA BAADHAYO SI XIRFADAHA GORGORTANKA LOO HAGAAJIYO.

Gabadha Shuba Maroni waxa ay gacanta ku haysaa xarun xanaano oo maalintii ah, oo ku taal xaafad dan yar ah, oo ah meesha la yidhaa Timarash. Shaqadeedu waxa ay ahayd mid caan ka noqotay dhinaca macaamiisheeda oo laga aqoon-saday dhinaca dawlada hoose ee magaalada iyo rugta ganacsiga sida ay uuga qayb qaadatay xoojinta dhaqaalaha dalka. Waalidiinta in ka badan 70% caruurta aan da'dii iskuulka gaadhin ee la xidhiidha barnaamijka waxa ay ka shaqeeyaan warshad kabaha samaysa oo afar sakadood goobta u jirta.

Nasiib darro se, waxa laga yaabaa in mudadii kiradu ka dhammaato, waana in ay heshaa goob kale inta mudada afarta bilood ah ee u hadhay ayna dhamaanin. Waxa ay haysaa fikrado ku saabsan sida ay shaqo dheeraad ah ugu qaban lahayd dadka xaafada dagan, waxase ay u baahan tahay guri ballaadhan. Ta kale waxa ay ka walaacsantahay in ay lacag galiso hagaajinta guri kira ah, oo hadana lagu qasbo mustaqbalka inay iskaga baxdo. Waxana u suurta galay in ay ururiso lacag dhan shan kun oo doolar sanadadii dhawrka ahaa ee tegay, iyada oo rajaynaysa in ay u suurta gasho inay dhis iibsato.

Josef Swartz, oo ah baayac mushtar, ayaa maqlay in Ms. Maroni laga saarayo gurigii dhawr bilood ka dib oo ay jeceshahay inay iibsato guri xaafada ku yaala. Waxa uu ku yidhi Ms Maroni markii uu kala xidhiidhay waxa ay rabto, "waxa aan leeyahay dhis baayac mushtar oo gaboobay oo imika layskaga tagay oo xaruntaada sadex sakadood u dhexeeyaan. Baahidaadana si fiican u daboolaya. Dhab ahaan waxa meeshu u baahantahay waxoogaa shaqo ah si ay wax u noqoto taana waxa aan hubaa in aynu ka wada shaqayn doono"

DSHISKA Biriishyada

Labadoodii ayaa dhawr cisho ka dib kulmay si dhiskii loo eego. Shuba markiiba meesha way ka heshay waxase ay ahayd gabadh baayacmushtar ah oo xariifad ah wayna qarisay dareenkeedii oo umay muujin Josef. Markii ay waydiisay inta uu siinayo dhiskan waxa uu ku jawaabay “waxa aan rabaa (50,000) oo doolar”, waxa ay markiiba ugu jawaabtay “ waa aad ciyaaraysaa! Anigu goob xanaano ayaan haystaa ee ma haysto goob dhaqaale” isna waxa uu ku jawaabay “ waxa aan hubaa in aynu wax isla eegi” intii ayna ka tagin dhiskii, waxa ay ku heshiiyeen inay dhawr maalmood ka dib kulmaan, bal si ay isula eegaan in heshiis ay ka gaadhi karaan iibka dhiskaa.

DSHISKA Biriishyada

TILMAAMO U GAAR AH GABADHA MARONI

Waxa aad la hadashay bank dalka ah, waxa ay ku amaahinayaan (45,000) oo doolar oo kaliya si dhiska aad u iibsato. Waxa kale oo aad la hadashay shirkad wax dhista si guriga ay u cusbonaysiiso inta aanad xaruntaada xanaanada soo rarin, waxana ay kharashkii dib u dhiska ku qiyaaseen (7,000) oo doolar. Qiimaha wareejinta farnijarka iyo qalabkaaga laga soo rarayo dhiskii hore ee loo soo rarayo dhiska cusub waxa lagu qiyaasay (3,000) oo doolar. Marka laysku wada geeyo qiimaha dhiska, iyo kii cusboonaysiinta iyo kii guurista waxa ay noqonayaan (60,000) oo doolar. Imika waxa aad haysataa (5,000) oo doolar oo aad biirsatay. Marka amaahda loo geeyo waxa is dhimaya lacag dhan (10,000) oo doolar, intaasi faraqa ah ma kartid, mase rabtid in fursadani guri iibsigu ku dhaafto, maxaa yeelay waxa aad is leedahay baahidaadii ayay daboolaysaa.

Waxa jira dhis yar oo dhiskan ka danbeeya oo aanad u baahnayn, waxana aad is leedahay waa la kirayn karaa, mase jeclid in aad qaado masuuliyadaa. Waxa kale oo aad maqashay in ninka Swartz uu leeyahay shirkad yar oo gawaadhi wax ku gurta. Marka la eego lacagta qiyaas ahaan kaa soo gali karta caruurta dheeraadka ah (ee la qoro) wax ayaad meelayn kartaa, waxana aad kartaa in aad siiso Swartz (50,000) oo doolar, hadii uu ogolaado (4,000) oo doolar oo lacagta guud ka mid ah in bil bil loo bixiyo mudo laba sanadood ah. Mase hubtid in uu ogolaan doono, oo aanu codsanayn in lacagta dhammaan markiiba uu qaato. Xataa hadii uu ogolaado in (4,000) oo doolar uu bixinteeda dib kuugu dhigo, wali waxa kaa dhiman (6,000) oo doolar oo soo galaya kharashkii lagu qiyaasay cusboonaysiinta iyo raritaanka. Waxa aad diyaar u tahay in aad gorgortan ka gasho heshiiska guud ee kuu suurta galinaya in aad u soo rarto xaruntaada xanaano maalmeed goobtan cusub marka kiradan socota xiligeedu dhammaado. Si kasta ha ahaatee waxa kaa go'an in aad hesho heshiiska uugu fiican.

Talooyin ninka Swartz u gaar ah.

Diyaar uuma tihid in aad hoos u dhigtid sicirka dhiskan. Waxase aad jeceshahay in aad dhiskan ka iibiso gabadha Maroni, sababa qof ahaaneed awgeed. Hooyadaa waxa ay ku dhalatay guri yar oo ku yaalay goobta dhiskan, intii aan dhiskan baayacmushtarka ah aan la dhisin. Caruurnimadeediina waxa ay ku qaadatay (hooyadaa) xaafadan intii aynay qayb kale oo magaalada ah u guurin .waxana ay aad ugu firfircoonayd taageerada barnaamijyada bulshada ee caruurta danyarta ah, intii aanay dhawr sano ka hor geeriyoon. Waxa maskaxdaada ku soo dhacay in ay fiican tahay in xarunta xanaano maalmeed lagu magacaabo "hooyadaa" si loogu sharfo, Mase hubtid sidii arinkaa aad uugu bandhigi lahayd gabadha Maroni.

Intii aanad go'aanka gaadhin iibinta dhiska waxa aad ka fikirtay in aad u badasho dhiska yar ee ka danbeeya xafiis maamula shaqadaada alaab gaadhi ku gurka, maad se gabagabayn arinkaa waxana aad raadinaysay goob kale oo xaafada ah, maxaa yeelay waxa aad is lahayd dhiska wayni waxa uu si fudud kaaga iibsami karaa haddii aad dhiskan yar raaciso (iibka).

DSHISKA Biriishyada

Tani ma aha hantidii ugu horaysay ee aad iibiso xaafadan. Laba hantiyood oo hore oo aad iibisay oo aad oglaatay qayb yar oo lacagta guud ah in aad dib u dhigto oo bishiiba waxoogaa, mudo gudaheed, lagu siiyo, labada xaaladoodba dadkii iibsaday guryuhu dib ayay uga dhaceen bixintii, waqti badan waxa kaa qaatay sidii aad lacagtaadii u soo ceshan lahayd, xaaskaagana waqti aan fogayn waxa aad u sheegtay, “waligay iibin maayo goob kale ilaa lacagteeda aan dhammaan markiiba ka wada qaato mooyee, maxaa yeelay dhakafaar uma taag hayo”. Waxa aad filaysaa in xarunta xanaanadu ay u geysatay xaafada wax qiimo badan, diyaarse uma tihid wax kasta si xarunta halkan loogu hayo, waxana kaa go’an in aad hantidaada siiso lacagtii aad bilawgii codsatay.

LIISKII BAADHITAANKA EE GOOBJOOGAYAASHA.

1- Dhinac kasta ma caddeeyay waxa uu ka rabo gorgortanka.

.....
.....
.....
.....

2- Waa maxay nuqdadaha u adag ee maslaxaad u baahani marka la gorgortamayay?

.....
.....
.....
.....

3- Maku jirtaa gorgortanka nuqdad tusaysa in dhinac kasta u soo dhaqaaqay in si wadaag ah mushkiladii loo xaliyo? Haday jirto, waa tee?

.....
.....
.....
.....

4- Labada dhinacba danahoodii ma la fuliyay markii la dooday? Bal sharax heshiiskii ugu danbeeyay.

.....
.....
.....
.....

DSHISKA Biriishyada

QALABKA 11: QIIMAYNTA TUSAALEYAASHA DHEXDHAXAADINTA IYO KUWA KUU GAAR AH OO AAD CURISO.

Ujeedooyinka waxbarashada:

- 1- In aad fahamto marka aad isticmaalayso dhexdhaxaadinta iyo marka aanad isticmaalayn, si iskudhaca loo gudogalo oo xal loogu raadiyo.
- 2- Si aad u hesho karti aad ku qorshayso geedi socodyo dhexdhaxaadineed oo ku haboon xalinta isku dhacyada gooba qoomiyadeed ama dhaqan oo gaar ah.

Waqtiga loo baahanyahay: 120 daqiiqadood

Kaydka loo baahan yahay: qoraaladii sida ku xusan tilmaamaha buuga koowaad ee buugaagtan

Geedi socodka:

- 1- Soo bandhig layliga adiga oo sharaxaya taariikhda dheer ee dhexdhaxaadinta, iyo dhaqanada badan ee lagu isticmaalo iyada oo laga dhiganayo qalab lagu xaliyo isku dhacyada (eeg cutubka 6 ee “akhiryaha” si, ra’yiga looga qaato). Ku liis garee dhawr sharax oo dhexdhaxaadinta ku saabsan waraaqaha balballaadhan ee laalaabma. Waxana aad waydiisaa ka qaybgalayaasha in ay akhriyaan oo ay ka doodaan arimaha sharaxyada dhexda u ah ee ay ka simanyihiin. Wad dooda adoo waydiinaya sida dhexdhaxaadintu uga duwan tahay gorgortanka, xaga geedi socodka lagu xalinayo isku dhaca.
- 2- Ku ururi waraaq caadi ah liis isku jira oo aan waxba loo eegin oo tusaya xaaladaha dhexdhaxaadinta ka dhiga istaraataji wax lagu guda galo oo haboon ama aan haboonayn si loo xaliyo khilaafaadkii. Eeg boga uugu dambeeya layliga ee liis garaynaya xaaladaha haboon ama aan haboonayn.

DSHISKA Biriishyada

- 3- U qaybi ka qaybgalayaasha laba kooxood oo is leeg. Waydii koox kasta in ay dib u eegaan liiskii kana doortaan xaaladaha ay dareemayaan in ay ku haboon yihiin dhexdhexaadin iyo xalaadaha aan ku haboonayn, iyaga oo sharax kooban

ka bixinaya doorashadooda ku saabsan xaalad kasta kuna qoraya arinkaa waraaqaha balbalaadhan. Sii (30) daqiiqo si hawsha loo dhammaystiro.

- 4- Sodan daqiiqo ka dib, waa in kooxihii dib u kulmaan oo keenaan liisaskoodii. Marka labadii liisba la sameeyo, ka dood meelaha ay isku dhaafsanyihiin adoo eegaaya sida ay xaaladaha u kala horaysiiyeen, Bal jawaabahooda barbardhig liiska bogga kan xiga ku yaal.

- 5- Adoo u diyaar garoobaya wajiga ugu danbeeya ee layliga, waxa aad siisaa ka qaybgalayaasha sadex tusaale oo dhexdhaxaadinta ah oo daabacan waa kuwa ku sharaxan cutubka 6 qaybta 1, ee buuga

Waa tusaalihii Raider-Coleman, iyo geedi socodkii dhexdhaxaadinta (asxaabta) iyo habkii Christopher Moore. Waxana aad tidhaa akhriya sadexdaa sharax, markaa u qaybi ka qaybgalayaasha kooxo yar yar oo ka kooban afar ilaa shan ka qaybgalayaasha ah. Koox kasta haka doodo tusaalayaashaa sadexda ihi meelaha ay iska shabahaan iyo meelaha ay ku kala duwan yihiin, markaa iyada oo la cuskanaya doodahooda, waxa aad diyaarinaysaa geedi socod dhexdhaxaadineed oo ay dareemayaan in uu aad ugu haboon yahay in dalkooda ama goobtooda lagu isticmaalo. Waa in koox kastaa ay waraaq caadi ah ku murtiyeeyaan wajiga ay wax u arkaan, si loo riboodhgareeyo oo looga doodo. Sii kooxaha ilaa (60) daqiiqo si hawsha ay u dhammaystiraan.

- 6- Dib u kulmi kooxaha si ay u bandhigaan riboodhadoodii. Waydii koox kasta in ay sharaxaan sida ay u gaadheen tusaalahoodan dhexdhexaadineed. Ku dhiiri kooxaha doodo ku saabsan meelaha layska shabaho iyo meelaha lagu kala duwan yahay.

- 7- Ku xidh fadhiga dood ku saabsan sida loogu isticmaalayo habkan khilaaf xalinta bulshadooda iyo goobta shaqadooda. Waxa kale oo aad waydiin kartaa in ay rumaysan yihiin in wajigan khilaaf xalintu caan ka noqondoono bulshadooda gudaheeda. Haddii arinku sidaa yahay waxa isweydiisaan sidee ayaa si tayo leh loogu isticmaali karaa?

DSHISKA Biriishyada

Xaaladaha Ka Dhigaya Dhexdhaxaadinta

Gudagal Haboon.

- Caadifad xoog leh ayaa saamaysay go'aankoodii.
- Dhinacyada oo is garanaya.
- Ma jiro faraq wayn oo u dhaxeeya xaga xidhiidhka awooda ee dhinacyada.
- Dadkan isku dhacay way wada nool yihiin, way wada shaqeeyaan, ama waxa jira sabab kale oo aanay ku kala fogaanayn.
- Dhinac ayaan ku niyad samayn in uu hor fadhiisto dhinaca kale iyada oo aan cid sadexaad la joogin.
- Dadka arinku khuseeyo ayaa raba in natiijadu gacantooda ku jirto.
- In xidhiidhka la ilaaliyo ayaa muhiim ah.
- Qolooyinka isku dhacay ayaa dareemaya in ay u baahan yihiin xirfadaha iyo taageerada dhinac sadexaad oo khilaafkooda ka shaqeeya.
- Waxa loo baahan yahay go'aan dag-dag ah.
- Sirta ayaa muhiim ah.
- Dad badan ayuu arinku khuseeyaa, sida khilaafka xaafadaha.
- Dhinacyada ayaa raba in ay ka fogaadaan geedi socod rasmi ah oo kharash badan oo dawladeed sida maxkamadaha.

Xaaladaha Ka Dhigaaya Dhexdhaxaadinta Mid Aan Haboonayn.

- Waxa jira wax xoog u tusaaya in dhinac uu rabo in uu u isticmaalo dhexdhaxaadinta si uu u sii huriyo iskudhaca ama u isticmaalo si uu u fuliyo arin uu hoosta ka wado, sida hadidaado, iyo xog ururin lays leeyahay mar dambe aad isticmaashid, qofka oo u eeg in aanu iskaashi diyaar u ahayn IWM.
- Dhinac ayaa doodihii bilawga ahaa yimid isaga oo aan karayn dhagaysiga dadka kale, ama ah mid aad u wareersan, hadii la gaadhi lahaa heshiis wadaag ah.
- Wax aad u xun ayaa isla markaa dhacay oo ka joojinaya dhinac ama labada dhinacba in ay si fiican uuga qayb qaataan.
- Xaga awooda oo aan isu dheelitirnayn, tan oo fogaynaysa in la gaadho go'aan loo dhan yahay .
- Dhinac, ama labada dhinacba oo ay u fiican tahay in meel kale ay tagaan sida maxkamadaha
- Arinka u muhiimsan ee laysku hayo oo aan lagu xalin karin dhexdhexaadin.
- Dhinacyada ugu mihiimsan ayaan diyaar u ahayn in ay geedi socodka ka qayb qaataan.

DSHISKA Biriishyada

- Dhinacna (labadaba) diyaar uma aha in uu eego xal khilaafaadkooda ku saabsan.
- Goob kale ayaa aad ugu haboon in iskudhacooda lagula tacaalo, sida : sharcigii oo la jabiyay.
- Ma jiro wax ballan qaadaya in heshiiskaas la fulinayo.

QALABKA 12: MAARAYNTA ISKU DHACA IYO AWOODA

La taliye
Safar

Qalabka soo socda waxa loo qorsheeyay in uu caawiyo dhexdhaxaadiyayaasha iyo gorgortamayaasha si ay u qiimeeyaan ilaha awooda ee kala duwan ee dadka, kooxaha iyo ururada ay siinayaan adeega. Xaaladaha dadka oo aan sinnayn, sida shaqadooda, kaydhooda dhaqaale, iyo goobaha awooda ee la filayo ee kale, waxa weeye had iyo jeer qaar lagu gorgortamo oo miiska yaala, dadku ha muujiyaan ama yaanay muujin eh. Waxana ay ku yeelanayaan saamayn wayn geedi socodka iyo natiijooyinkaba. Waxana wanaagsan in la qiro jiraalkooda loona diyaar garoobo, halkii laga soo qaadi lahaa in ay si uun u tagi ama aanay muhiim ahayn.

Marka waxoogaa, hag-hagaajina lagu daro geedi socodka hoos ku sharaxan, waxa qalabkani noqon karaa layli wacyigalin iyo aqoon iswaydaarsi oo xoojinaya aqoonta. Haddii hab tababareed loo isticmaalo, ka fikir in fadhiga lagu bilaabo dood la hagayo oo ku saabsan qalab wax lagu qeexayo oo waydiimaha ka horreeya.

Ujeedada waxbarashada: in la qiimeeyo ilaha kala duwan ee awooda ee ay leeyihiin dhinacyada ka qaybgalayaasha ee loo qorsheeyay in ay ka qaybqaataan geedi socodyada gorgortanka ama dhexdhexaadinta **Waqtiga loo baahan yahay:** 90-120 daqiiqadood.

Kaydka loo baahan yahay: waydiimo is qiimayn ah

Khariirada fikradeed ee ilaha awooda: French iyo Raven1 waxa ay tilmaameen darajooyin kala duwan oo awood ah oo ay muhiim tahay in la ogaado iyada oo laga dhuganayo dhinaca isku dhac iyo khilaaf maaraynta. Waxa aynu ka soo qaadaynaa in ay jiraan laba dhinac oo kaliya oo isku dhac ama khilaaf dhex yaal marka aynu sharaxayno ilahan awooda. Qaar badan ayay noqonkaraan, markaa waa in mid kasta la qiimeeyaa iyada oo la eegayo xidhiidhka uu ka kale la leeyahay laguna salaynayo xaaladaa gaarka ah. Ilaha awoodu waxa weeye:

DSHISKA Biriishyada

- **Awoodii abaalinta:** waxana ay ku dhisantahay iyada oo dhinaca (B) rumaysanyahay in dhinaca (A) uu xaaladaa isku dhaca bixinayo abaal gud-dalacsiin, gargaar, aqoonsi, ogolansho qalab iyo kayd kale.
- **Awooda qasabka:** waxa ay cuskanaysa (B) oo dareemaya in (A) karti uu u leeyahay in uu gaysto ciqaabo, xanuujin, canaan, hoos u dhig, dano uu qofka ka xayuubiyo.
- **Awood sharci :** waxa ay cuskanaysaa qofka oo shaqo gaar ah haya, ama xil ama xafiis urur ama bulsho. Xilkaasi waxa uu qofkaa siinayaa in uu awood ku isticmaalo dadkii kale.
- **Awood la cuskanayo:** waxa weeye qofka (B) oo aqoonsan in (A) uu yahay dhinaca haysta wax siinaya ixtiraam, in la adeeco, lana raaco
- **Awood khibradeed:** waxa ay ka imanaysaa (B) oo rumaysan in (A) uu leeyahay aqoon gaar ah, iyo xirfad ama khibrad.

1. French iyo ~~Raven~~ (asaaska awooda bulsho) P. Cartwright(ed) barashada arrimaha bulshada (Ann Arbor, jaamacadda Michigan 1959)

- **Awood xogeed:** waxa ay ku dhisantahay dhinaca (B) oo rumaysan in (A) uu hayo xog ama heli karo xog geedi socodka natiijadiisa muhiim u ah. lixdaa heer awood ee French iyo Raven sheegeen waxa aynu ku dari karnaa laba kale oo inta badan soo mara xaaladaha khilaafka.
- **Awooda xidhiidhka:** waxa ay ku xidhantahay (B) oo rumaysan in (A) xidhiidh la leeyahay dad muhiim ah ama wax raadayn kara.
- **Awooda (isbadal) caawiye:** waxa ay ka dhalanaysaa kartida la iskugu gaygayn karo laba ama in ka badan oo awoodo ah oo aanay awood kali ihi iskeed ku filnayn in ay natiijo keento .

Asaasyadaa awoodeed, sadex ka mid ah, abaalinta, qasabka, iyo awooda sharci waxa ay diirada saaraan qofka awooda haya iyo kartidiisa uu ku badali karo dhaqanka dhinaca kale, in kasta oo dhinacaasi uu is caabiyaayo. Afarta nooc ee awoodeed ee soo hadhay, xogtii, cuskashada, khibrada, iyo xidhiidhku inta badan waxa ay ka qaybqaataan guusha uu dhinac xaalad iskudhaca ku guulaysanayo isaga oo cuskanaya dareenka dhinaca kale uu ka qabo inta ay xoogan tahay ama jilicsantahay ilahaa awoodeed.

Maaraynta Xidhiidhada Awooda

Waxa laga yaabaa in ay muhiim tahay in laga fikiro raa'iyiyo asaasi ah oo la xidhiidha dabeecada awooda ee goobaha ay ka jiraan khilaafaad iyo isku dhacayo maarayn u baahan.

- Xidhiidhada awoodu waxa ay ku jiraan dhaqdhaqaaq, mana taagna, waxana ay la kulmayaan dib u gorgortan jooqta ah.
- Awood maqnaanta dhinaca xidhiidha badan, ayaa ka faafi og awood isticmaalka.
- Awooda oo maqani waxa ay ka dhigaysaa dadka iyo alkumyadooda in ay u cabanaadaan deegaamadooda.

DSHISKA Biriishyada

- Buuxinta iyo maaraynta awooda maqan ayaa ka wax ku oolsan maaraynta awooda korodha.
- Kuwa aan awooda lahayn ee ururada iyo bulshooyinka ka mid ihi inta badan ma aqoonsana xooga ay ku leeyihiin xidhiidhada awooda.
- Geedi socodka daryeelka awooda waxa ku jira in ay si joogta ah isku baayacaan dadka is leh awood ayaa haysataan iyo kuwa is leh ma haystaan.
- Kuwa awooda badani waxa ay u baahan yihiin in awoodoodaasi ay u haystaan si xaq ah oo ku jirta xidhiidh koobaya isticmaalkeedii, ilaalinaya xaqeedii.
- Awooda u horaysa ee dadka aan awooda lahayni waxa weeye iyaga oo si habaysan u isticmaala wax rumaysi la'aanta. Sida : in ay diidaan ogolaanshaha sharaxa uu bixiyo qof awoodi ka danbaysaa,
- Ilaha awoodaha al kumyadu way xayndaabanyihiin, xayndaabyadaasi dib ayaa loo sharixi karaa. (Sharax cusub ayaa la siin karaa).
- Awooda oo la wadaagaa la mid ma aha awooda oo la bixiyo (faraha laga qaado).

Dhexdhaxaadiyaha ama gorgortamaha libta soo hoynayaa ma fududaysto ilxuna kuma eego kaalinta awoodu gaysan karto marka la maaraynayo hawl maalmeedka isku dhacyada iyo khilaafaadka ku saabsan.

QIIMAYNTA ILAHA AWOODA EE XAALADHA ISKU DHACA

Dhinac kasta oo ku jira xaalad iskudhac waxa uu leeyahay ila awoodeed oo heerarkeedu ay kala duwan yihiin oo ka caawinaya in uu ama xaliyo iskudhacii ama sii wado. Waydiimahan soo socda waxa loo qorsheeyay in ay qiimeeyaan suurtagalka ay dhinacyada u mudan ee ka mid ah xaalad isku dhac ah oo gaar ihi ay raadayn karaan natiijooyinka, isticmaalina karaan ilahaa awoodeed. Waxa ku liis garaysan shaxda hoos ku sawiran dhinaceeda bidix todoba ilood oo awoodi ku jirto. Midigtana waxa ku yaal laba tiir oo qiimaynaya in ilahaa awoodeed ay noqon karaan arimo raadaynaya natiijooyinka xal kasta oo gorgortan ama dhexdhexadin ku yimaad. Qalabkanina waxa uu malaystay in hawshan iskudhac xalintu khusayso laba dhinac oo kaliya. Ku dar tiirar badan hadii loo baahdo.

Waxa jira sadex doorasho oo qiimaynaya in ilahaa awoodeed noqon karaan arimo raadaynaya natiijada xal kasta oo gorgortan ama dhexdhaxaadin ku yimaad.

1= Arin raadeynaya ma aha; 2- Arin raadeeynaya ayuu noqon karaa; 3= waxa la hubaa in uu yahay arin wax raadaynaya.

DSHISKA Biriishyada

Waxa aad goobo ku samaysaa tirada tiir kasta ku xusan ee matalaysa ta aad xukun ahaan doori lahayd marka la eego inta ilahaa awoodeed noqon karaan qaar raadaynaya natijada gorgortanka ama dhexdhexaadinta xaaladan khilaaf.

Nooca awooda	Dhinaca A	Dhinaca B
Awoodii abaalinta: kartida wax lagu abaalin karo, iyada oo la adeegasanayo arimo ay ka mid yihiin, dalacsiin, gargaar, aqoonsi, in lagu ogolaado xog ama kayd kale	1 2 3	1 2 3
Awooda qasabka: kartida ciqaabta iyada oo la marayo: casilaad, eri, canaan, dana laga xayuubiyo	1 2 3	1 2 3
Awooda sharci: in aad leedahay xaq sharci oo aad ku isticmaali karto dadka kale.		
Awood la cuskado: adoo fahamsan in aad leedahay sifaad shakhsiyadeed oo kuu keenaya ixtiraam, adeecid, raacid	1 2 3	1 2 3
Awood khibradeed: waxa uu leeyahay xirfad iyo khibrad uu ku helo waxa uu rabo	1 2 3	1 2 3
Awood xogeed: xog ayuu hayaa ama heli karaa taas oo xaaladan iyaga muhiim u ah.	1 2 3	1 2 3
Awood xidhiidh: waxa uu xidhiidh la leeyahay dad wax raadayn kara ama muhiim ah oo caawin kara iyaga.	1 2 3	1 2 3

DSHISKA Biriishyada

DIYAARINTA ISTARAJI AWOODEED

Iyada oo la eegayo qiimayntaa imika dhammaatay, sidee ayaad uga faaiidaysan kartaa adiga oo ah ama dhinac gorgortan ama dhexdhexaadin galaya, ama ah dhinac sadexaad oo gorgortame ama dhexdhexaadiye ah? Xaaladaha mid kasta waxa aad u baahantahay in aad diyaariso istaraajigaaga inta aanu gorgortanka ama dhexdhexaadintu bilaabmin. Waxa aad halkan ku arki tilmaamo ku saabsan talaabooyinka aad qaadayso si aad u diyaargarawdo.

- 1. Liis garee dhammaan ilihii awoodeed ee lagu qiimeeyay (3) arin la hubo, iyo (2) Arin la filayo, kana jawaab su'aalaha soo socda

Dhinaca A _____

Arinkii _____

Ma la isticmaalayaa ishan awoodeed si loo xaliyo iskudhaca ama khilaafka?

(haa: _____ may _____) amase arinka sidaasi loo daayo?

(haa: _____ may _____) maxaad sidaa ugu malaysay

.....
.....
.....

Hadii aad tahay dhinaca A, waa maxay istaraajigaaga aad ku isticmaalayso ishan awoodeed?

Hadii aad tahay dhinaca B, waa maxay istaraajigaaga aad kula tacaalayso isticmaalka ishan awoodeed ee ka timid dhinaca kale ee isku dhaca?

.....
.....
.....

(Samee foomam dheeraad ah si aad u diyaariso istaraajigaaga)

DSHISKA Biriishyada

Dhinaca B: _____

Arinkii : _____

Ishan awoodeed ma loo isticmaali karaa in lagu xaliyo iskudhacii ama khilaafkii?

(haa: _____ may _____) amase arinka sidiisaa loo daayo?

(haa: _____ may: _____) maxaad ugu maleysay in arinku sidaa yahay.

.....
.....
.....

Hadii aad tahay dhinaca B, waa maxay istaraatajigaaga aad ku isticmaalayso ishan awoodeed?

Hadii aad tahay dhinaca A, waa maxay istaraatajiga aad kula tacaalayso hadii dhinaca kale ee iskudhacu isticmaalo ishan awoodeed?

.....
.....
.....

(Samee foomam dheeraad ah si aad u diyaariso istaraatajigaaga)

DSHISKA Biriishyada

QALABKA 13: MATALAAD KHILAAF

Ujeedada waxbarashada: si loo helo xirfad tababar oo loogu diyaar garoobo dhexdhexaadin lana dhexdhexaadiyo khilaaf ku saabsan dhis magaalo: matalaad qaynuun fulin.

Waqtiga loo baahan yahay: 180 daqiiqo.

Kaydka loo baahan yahay: laba qoraal: mid xaalad ah, iyo mid tilmaamaya goobjoogaha.

Geedi socodka:

1. Ku bilaw layliga adoo u sheegaya ka qaybgalayaasha in ay galaan matalaad laba qaybood ah. Xaalad, khilaaf ku saabsan ogolaansho dhis, tan oo matalaadii noqonaysa. Waxa ay ku saabsan tahay khilaaf dhexyaal saraakiisha magaalada iyo sharkad wax soo saarta (samaysa) oo loo diiday ogolaansho dhis warshadeed iyada oo la leeyahay waxa ay khilaafsan tahay qaynuunkii dhiska ee magaalada. Xaalada qoraalkeeda oo dhan waxa aad ka heli sharaxa layligan gabagabadiisa ku yaal.
2. Qaybta hore ee matalaadu waxa weeye shir dhexyaal dhexdhaxaadiyayaashii iyo dhinacyadii mudnaa ee iskudhaca: madaxii sharkada wax samaynaysa ee rabtay magaalada in wax ay ka dhisto, ingineerkooda wayn, maayarka iyo sarkaalkii fulinayay sharciga deegaanka. Ujeedada shirkani waxa weeye in la caawiyo ergada labada dhinacba sidii ay u fahmi lahaayeen mabaadiida iyo geedi socodka dhexdhaxaadinta. Marxaladan u horaysa waxa ay qaadanaysaa 45 daqiiqo.
3. Sharax qaybta labaad ee matalada in ay ka koobantahay laba wareeg oo dhexdhaxaadina si loo siiyo ka qaybgalayaal badan khibrad toos ah oo lagu qabto hawsha dhexdhaxaadinta. Mid kasta oo ka mid ah matalaada dhexdhaxaadintu waxa ay qaadanaysaa 60- 90 daqiiqo.
4. U qaybi ka qaybgalayaasha laba kooxood, sii ka qaybgalayaasha koox kasta sawir (nuqul) xaalada ku saabsan waxana aad waydiisaa inay akhriyaan. Marka ay akhriya ay dhammeeyaan, qaado waxoogaa daqiiqado ah si aad u goyso cida jilaysa kaalintii kooxda dhexdhaxaadinta ee labada qof ahayd iyo afarta dhinac ee roonroon ee iskudhaca inta lagu jiro matalaada labada qaybood ah, marka go'amadaa la sameeyo u sheeg dadka koox kasta oo jilaysa kaalintii dhexdhaxaadiyaasha inay isticmaalaan

DSHISKA Biriishyada

tusaalihii Raider iyo Coleman ee dhexdhaxaadinta ee lagu sharaxay cutubka lix ee “akhriyaha”. Maskaxda loo isticmaalay tusaalahan waxa ay ka soo jeedaa sahlanida marka labada (tusaale) ee kale loo eego, waxa aad u sheegtaa ka qaybgalayaasha koox kasta oo aan jilayn kaalmo, bal inay qaataan (kaalinta) goobjoogayaasha. Mid kasta oo ka mid ah goobjoogayaasha sii tilmaamihii goobjoogaha inta kooxdoodii dhab ahaan ay ku jiraan matalaadii.

5. Waydii labada kooxood inay ku kulmaan laba goobood oo kala gooni ah. U sheeg koox kasta oo ka qayb galayaasha dhinac kasta oo khilaafka ah ka tirsan iyo kooxaha dhexdhexaadintaba inay goonidooda u shiraan si shirka loogu diyaar garoobo. Bal eeg marxalada is diyaarinta ee tusaalaha Raider iyo Coleman. (15) Daqiiqo kadib u sheeg ka qayb galayaasha koox kasta inay dhammays tiraan shirkii is diyaarinta iyaga oo u diyaar garoobaya matalaadii dhexdhaxaadinta soo socota.
6. Inta labada kooxood shirayaan si ay ugu diyaar garoobaan fadhigii is diyaarinta, waydii goobjoogayaasha koox kasta in ay caawiyaan diyaarinta iyo qalabaynta qolka tababarka si dhexdhexaadinta si haboon loogu habeeyo. Eeg marxalada 1^{aad} Furitaanka dhexdhaxaadinta ee tusaalihii Raider iyo Coleman. Marka ka qaybgalayaashii labada kooxood diyaar garoobaan bilaw qaybtii labaad ee matalaada, adiga oo waydiinaya xubnihii kooxda koowaad inay fadhiistaan miiska loo diyaariyay matalaada dhexdhaxaadinta. Iyaga oo goobjoogayaashii iyo xubnihii kooxda labaad fadhiya wareega (hareeraha) miiska dhexdhaxaadinta, bilaw matalaadii. 60 ilaa 90 daqiiqo kadib, marxalada dhexdhaxaadintu marka ay dhammaato, gabagabee matalaadii. Dhawr daqiiqo ka dib, iyaga oo xubnihii kooxda labaad fadhiya miiska, bilaw wareegii labaad ee dhexdhaxaadinta imika, iyaga oo goobjoogayaashii iyo xubnihii kooxda hore fadhiyaan wareega (hareeraha) miiska dhexdhaxaadinta.
7. Marka la dhammeeyo wareega labaad ee dhexdhaxaadinta, war celin weydii goobjoogayaasha, ka qaybgalayaasha labada kooxoodna ha galaan dood layligii ah.

Fiiro ugaar ah tababaraha: layligan matalaada ah waxa loo badali karaa siyaabo badan si uu ugu haboonaado baahiyaha ka qaybgalayaasha tababarka. Tan waxa ay noqon kartaa in sikale loo qoro iyada oo la milicsanayo xaalad ay ka qaybgalayaashu aad u garanayaan, iyada oo la badalayo kaalmaha la fulinayo ee geedi socodka dhexdhaxaadinta ama la isticmaalayo tusaale dhexdhaxaadin ah oo duwan, ujeedadu se waa isku mid uun. Waxa weeye in ka qaybgalayaasha lagu caawiyo geedi socodka dhexdhexaadinta oo ay helaan xirfad dhexdhaxaadineed.

DSHISKA Biriishyada

XAALAD BAADHIS : KHILAAF KU SAABSAN OGOLAANSHO DHIS:

Sarkaalkii hirgalinta qaynuunka deegaanka ee magaalada ayaa isla markaasi diiday inuu ogolaado in laga dhiso warshad cusub oo wax soo saaraysa magaalada xuduudeeda. Diidmaduna waxa ay cuskanaysaa farsamo khusaysa waxyaalo warshadu hawada ku sii daynayso oo neef aan la ogolayn ah oo dhaafsan boqolkiiba shantii amarka dowlada hoose ogolaa. Qaynuunkan neefta sii daynteeda la ogol yahayna waxa qaatay gole hore oo la doortay. Sarkaalkanina wuu hagaagsan yahay sida uu qaanuunka u arko xaqna waxa uu u leeyahay in uu diido ogolaanshaha dhiskaa. Waxana sarkaalku uu taageero ka haystaa koox yar oo urur deegaan ah, hase yeeshee cod dheer, oo xafiisyo ku leh magaalada. Waxana ay kooxdaa deegaanku u sheegeen sarkaalka si aan rasmi ahayn inay diyaar u yihiin in ay talaabo sharci ah la tiigsanayaan magaalada hadii ama madaxada sarkaalka oo ah maayarka ama golaha magaaladu diidaan go'aanka sarkaalkaa.

Maayarkuna waxa uu ku hawlan yahay in markale la soo doorto waxana uu kaambayn u galay in uu kordhiyo fursadaha shaqooyinka magaalada gudaheeda. Warshada cusub ee wax soo saaraysaana waxa ay abuuraysaa 250 shaqo oo cusub oo aad magaalada iyo gobolkuba uugu baahan yahay. waxaana lagu yaqaanaa in uu nidar ugalay inuu taageero shaqaalihisa, gaar ahaan marka go'aanadoodu ay ku dhisan yihiin xukun iyo xeer macquul ah.

Ta kale maayarku waxa uu helay taageerada ururkaa deegaameed iyo xubnaha ururkaa markii uu isu soo sharaxay sadex sano ka hor xafiiska, waxana lagu yaqaanaa aragtiyihiisa xooga badan ee ilaalinta deegaanka. Maayarkii ayaa isla markaa ku dhawaaqay in uu taageerayo go'aankii sarkaalka hirgelinta qaynuunka inkasta oo taasi ay wax yeelayso awooda dhaqaale ee magaalada sida imika muuqata

Markii ay maqleen go'aanka maayarka ayaa rugtii ganacsigu ay qabatay shir jaraa'id oo ay si kulul u weerartay maayarku go'aankaa uu qaatay, iyaga oo isla markaa sheegaya in rugtuba ay doonayso ilaalinta deeganka. Ururka deegaankuna waxa weeye mid ka mid ah xubnaha ka tirsan rugta ganacsiga ee aadka u firfircoon. Af hayeen ka tirsan warshadii wax samaynaysay ayaa joogay shirkii jaraa'id waxana uu halkaa ka sheegay in shirkadu diyaar u tahay in ay meel kale raadsato haddii aan "shaqadan foosha xun" aan xal laga gaadhin. AF hayeenka warshadu waxa uu ka mid ahaa shaqaalaha hirgalinta xeerka mar hore, waase laga maarmay markii uu aad u jajabnaaday xaga hirgelinta xeerarka.

Hadaba intii aan shirka jaraa'id dhammaan ayaa madaxii hore ee rugta oo ah qareen aad magaalada looga ixtiraamo, ayaa soo jeediyay inay fiicantahay in loo yeedho koox dhex ah oo dhexdhaxaadiyayaal ah oo ka socda magaalo kale si ay u eegaan arinkan bal inay iskudhaca xaliyaan. hadalkiisa waxa uu ku qiray in labada dhinacba xaq u leeyihiin in ay arinka geeyaan maxkamadaha si loo kala xukumo, waxa se uu sheegay in uu ra'yi ka qabo sidaasi. Waanu sii waday hadalka isaga oo saadaalinaya "waxa laga yaabaa in ay bilo qaadato in go'aan la gaadho, labada dhinacbana lacag badani kaga baxdo kharashka sharciga, bulshadana kala jabiso oo bogsigeedu sanado qaato"

DSHISKA Biriishyada

Markii uu maayarkii ka akhriyay shirkii jaraa'id, tan oo ku soo baxday jaraa'idkii maalintii labaad, waxa uu la xidhiidhay saaxiibkii oo ahaa madaxii hore ee rugta ganacsiga, bal in uu war badan ka bixiyo sidii uu isku dhaca ugu gudbin lahaa dhexdhexaadin. Gorfayntii ka dib maayarkii ayaa la hadlay madaxii shirkada qorshaynaysay in ay ka dhisto warshada cusub ee wax soo saaraysa magaaladiisa. Markii ay wada hadal dheer yeesheen, ayay ku heshiiyeen in ay la xidhiidhaan adeeg dhexdhexaadineed oo caan ah si shir loo qabto.

Tilmaamihii Dhexdhexaadinta ee Goobjoogaha

- 1 Guud ahaan, ma u eegtahay bilawga dhexdhexaadinta in labada dhinacba si fiican u diyaar garoobeen, sida: in ay u muuqdaan in ay rabaan galitaanka dhexdhexaadinta, in ay u eegyihiin in ay fahamsanyihiin geedi socodka dhexdhexaadinta, in ay u eegyihiin in ay ku kalsoonyihiin dhexdhexaadiyaha. Bal kan u eeg shirkii ka horreeyay ee gogol xaadhka ahaa?

.....
.....
.....
.....

- 2 Sideed u qiimaynaysaa adeega dhexdhexaadiyaha in uu u qabanayo dhexdhexaadintii sida ku xusan marxalada koowaad: furitaanka dhexdhexaadinta?

.....
.....
.....
.....

- 3 **Markii lagu jiray marxalada labaad:** ee la qeexayay arimaha, ka waran tayada dhexdhexaadiyaha markii uu tusaalaha ka bixinayay dhaqanada ay soo bandhigayaan dhinacyadu. Sida: dhagaysi fiican, su'aalo fiicfiican, soo koobida nuqdadaha ay sheegeen dhinacyadu, tilmaamida meelaha lagu heshiiska yahay?

.....
.....
.....
.....

DSHISKA Biriishyada

- 4 Si fiican ma u caawiyay dhexdhexaadiyuhu ka qaybgalayaasha in dhinacba dhinaca kale uu dareenkiisa arinka ku saabsan fahmo, markii lagu jiray marxalada sadexaad: in xal la helo iyada oo lagu caawinayo dhinacyada in ay caddeeyaan malahooda oo ay curiyaan xalal la kala dooran karo?

.....
.....
.....
.....

- 5 Dhexdhexaadiyaha tayadiisa ka waran markii marxalada afraad lagu jiray: xidhitaanka dhexdhexaadinta, iyada oo lagu caawinayo in la jaribo xalkii lagu heshiiyay, oo laga qaado ballan (damaano) In dhinacyadu ay diyaar u yihiin fulinta waajibka laga rabo ee ay isku leeyihiin dhinacyadu sida heshiisku sheegayo?

.....
.....
.....
.....

QALABKA 14: SAWIRADA WADA HADALKA.

La taliye
Safar

Kani waxa uu noqon karaa layli fiican oo aad ku gabagabayso aqoon iswaydaarsigaagii. Geedi socodka aanu ku murtiyeynay tilmaamaha soo socda waxa loo qaybiyay si waafaqsan mid lagu xusay buug cusub oo ku saabsan isticmaalka wada hadalka .(eeg raad raaca si aad sharax dheeraad ah buuga uuga hesho). Layliga oo la badalay ayaa lagu isticmaalay dhammaadkii aqoon iswaydaarsi goboleed lagu qabtay Romania halkaa oo qalabkan lagu sameeyay tijaabo goobeed. Tijaabo goobeedkaa, ka qaybgala kasta waxa la siiyay waraaq cad iyo in uu qaadan karo tiro badan oo qalimo badan oo wax lagu calaamadiyo ah waxaana lagu yidhi bal adigu isku sawir gudaha iskudhacaa. Markii fikradahaa loo muujiyay qaab farshaxan ah, qof kasta waxa lagu amray in uu sawirka u gudbiyo dadka kale si ay wax uugu dari karaan sawirka. Waxana laga codsaday ka qaybgalayaashii in ay u shaqeeyaan iyaga oo ah kooxo yar yar oo 6 ilaa 8 ah , markaa kaqaybgalyaasha aqoon iswaydaarisgaagana, haddii aad goosato in aad samayso wax sidan oo kale ah , waxa loo baahan karaa dhexgalo la sameeyo iyo kooxo kuwan ka duwan. Layligan iyo kuwa kaleba waxa fiican in ay waxyaalaha aad kala dooranaysaan ay noqdaan qaar furan.

Gabagabadii iskudayada kooxahaa, sawirada waxa la dhigay dhulka si ay u dhaliyaan koox la isu geegeeyay. qof kasta waxa uu ka hadlay sawirkiisii iyo micnihii uu is lahaa, gaar ahaan marka uu eego waxyaalaha asxaabtiisu ku soo kordhiyeen.

Kani hubaal waxa weeye qalab la badali karo si uu uugu haboonaado danaha iyo dareemada ka qaybgalayaasha iyo tababarayaasha. Ha ka biqin in aad tijaabiso si aad u caawiso ka qaybgalayaashu in ay sawiraan dareenkooda hoose ee ku saabsan khibradahooda aqoon iswaydaarsigan iyo guud ahaan fikradahooda ku saabsan isku dhacaba. Qalabka 15^{naad}, ee ku xiga kan, waxa isna uu ku saabsan yahay geedi socodka lagu curinayo wadahalada waxa aad u baahantahay in aad baadho isaga iyo waliba sida aad uugu soo bandhigayso ka qaybgalayaasha aqoon iswaydaarsiga qalabkan muhiimka ah ee ku saabsan iskudhac maaraynta .

Imika halkan waxa aad ku arki qorshihii aasaasiga ahaa si aad u eegto

Ujeedada waxbarashada : in la kordhiyo aqoonta iyo xirfada lagu dhalinayo wada hadal wax soo saar leh.

Wagtiga loo baahanyahay: 30 daqiiqo

Kaydka loo baahan yahay :

- o In ka qaybgale kasta haysto warqad cad oo adag. Oo waraaqaha (A-4)ka laban laabkood ah ama ugu yaraan 18 x 24 inch.

DSHISKA Biriishyada

- Midabo biyood fara badan, Qalimo midabo ah oo wax calaamadiya, rinji biyaha ku milmaya, iyo wax kasta oo aad kan kaga dhigi karto “khibrad midab badan”.
- Marka aad qaadatay qalabkaagii aad dooratay ee aad wax ku curinaysay, waxa aad u baahan kartaa, burush rinji, koobab biyo ah, iyo wixii la mid ah.
- Saacad gacantii il bidhiqsiyada leh, iyo
- Jalas nooc uun ah. Waxa uu noqon karaa mid fudud sida koob quraarad ah iyo malqaacad oo aad ka amaansaystay madbakha goobtaasi.

Geedi socodkii:

- 1) Hadii aad la shaqaynayso koox uu haysto iskudhac ama mushkiladi ay waajahday taas oo jitamaysay wiigag ama bilo, ku isticmaal layligan mushkiladaasi adoo iyada bar tilamaameed ka dhiganaya. Waxana aad badal ahaan ka doontaa kooxda in ay doortaan arin isku dhac ah oo imika waajahaya. Marka la isticmaalo mushkilad ay iyagu garanayaan waxa ay caawinaysaa kooxda sidii ay aragtiyo iyo dareemo cusub uuga qaadan la haayeen xalinteeda.
- 2) Waxa aad siisaa ka qaybgale kasta gobal warqad adag ah iyo qalabkii sawirka ee kor lagu xusay. Ha fadhiistaan ka qaybgalayaashu miisas ballaadhan oo 6 ilaa 8 qof qaadaya oo si raaxo ah ay ugu shaqayn karaan, samee kooxo badan haddii loo baahdo, ku qor mawduuca ay kooxdu goosteen in ay ka shaqeeyaan waraaqaha balbalaadhan ee laablaabmay waxana aad sharaxdaa geedi socodkii iyaga oo ka qaybgalayaashu fadhiya.
- 3) Fudeydiyeyashii ayaa bilaabaya geedi socodka iyada oo ka qaybgalayaashii ay si dagan u fadhiisanayaan oo daqiiqad ama laba aamusayaan, waa fursad diirada la saarayo arinkii si maskaxda qofka iyo dareenkiisa hoose uu sawirku ugu dago.
- 4) Daqiiqad ama laba kadib, fudeydiyihii ayaa garaacaya jalaska, isaga oo bilaabaya kii u horeeyay ee wareegyada daqiiqada kaliya ah. Wareeg kasta, waa in qofkii ku gudbiyaa warqadii la siiyay sawir ku saabsan arinka.
- 5) Hal daqiiqo ka dib, fudeydiyihii ayaa jalaska garaacaya, qof kastaana waxa uu u dhiibayaa warqadii uu ku xusay sawirka uu arinka ka qabo qofka dhinaca midig ka xiga.
- 6) Marka qof kasta helo sawiro arigtiyeed oo cusub naftiisa ha u sheego “maxaa lagu dari karaa si arinka loo sii caddeeyo” markaa sawirkiisa cusub ha ku kordhiyo warqada. Waxa uu soconayaa wareegaa halka daqiiqa ihi ilaa qof kasta oo miiska fadhiya ay soo gaadhayso warqadii uu ku bilaabay.

DSHISKA Biriishyada

- 7) Nuqdadan marka la gaadho ayaa fudaydiyayaashii waydiinayaan ka qaybgalayaasha in ay wadaagaan waraaqaha miiskooda yaala, oo ku dhajinayaan gidaarka si looga doodo, ama waxa ay qaadayaan talaaba kasta oo loo arko in dooda kooxdu ku haboon tahay. Fudaydiyuhu waxa uu ku dhiirinayaa koox kasta in ay baadhaan xogta magac u yaalka ah ee ay gaadhaan (abuuraan) si ay arinka si qoto dheer ugu fahmaan.
- 8) Fudaydiyuhu waxa uu keeni karaa su'aalo ama weedho kuwa soo socda oo kale ah si uu uuga caawiyo kooxda geedi socodka xogta iyo fikradaha lagu curiyay layligan,
- Maxaad aragtaa?
 - Sawiradu hakula hadlaan.
 - Maka soo baxeen mawduucyo iyo fikrado dhex ihi farshaxankii si loo dhanyahay loo sameeyay?
 - Ma jiraan faraqo muuqdaa? Haddii ay jiraan maxaad u malaynaysaa micnahooda?
 - Dhageyso wixii la curiyay isna dhagaysta.
 - Jooji waxa aad gaadho ee xukun ah.

[Layligan la badalay waxa laga soo qaatay hawl la fulinayay oo ku timid buug la yidhaa: wadahadal: dib u helitaanka awooda wax badalka ee wada hadalka, oo ay qortay Linda Ellinor iyo Glenna Gerard. Waxa daabacay 1998 kii John Wiley iyo caruurtiisii "hawshaa la fulinaayo" ee aynu xiganay waxa ay ku timid boga130 - 2 hadii aad rabto in wax badan aad ka ogaato (barato) geedi socodka wada hadalka si kal iyo laab ah ayaanu buugaa kuugu dardaaraynaa].

DSHISKA Biriishyada

QALABKA 15: BARASHADA FARSHAXANKA FIICAN EE WADA HADALKA

Ujeedada waxbarashada: si loo kordhiyo fahamka iyo xirfada isticmaalka siyalaha lagu qeexo wada hadalka.

Waqtiga loo baahan yahay: 90 ilaa 120 daqiiqo.

Kaydka loo baahan yahay:

1. **Ushii hadalka:** usha hadalku waxa weeye fikrad bulshada maraykanka ka soo jeeda. Golayaashu marka ay shirayaan waxa loo dhiibaa ushaa, hoggaanka iyo kolba qofka hoggaanka haya si ay u tilmaamto qofka goobta haysta, ama loo ogolaaday in uu qaato fursada hadalka. Waxana weeye calaamad ixtiraam, oo diirada saaraysa qofka haysta usha hadalka. faa'iidadeeda u muhiimsana waxa weeye in ay joojinayso hadal is dhaaf dhaafka oo gaabinayso xawligii wada hadalka.
2. **Waydiimo qiimayn ah :** waydiimaha qiimaynta waxa loo qorsheeyay in ay bixiyaan war celin ku saabsan xirfadaha hore u marinaya wada hadalka tayada leh. Waxa weheliya oo aad heli inta aan layliga wada hadalku bilaabmin nuskhad (nuqul) ku saabsan su'aalaha la soo jeedinaayo iyo qoraalo tusaya dooda la hagayo.

Geedi socodka:

1. Ku bilaw khibradan waxbarasho dood la hagayo oo ku saabsan xirfadaha iyo dhaqanada ku jira qabashada wada hadalka. Eeg qoraalada tababaraha ee la socda sharaxa geedi socodkan tababarka ah ee la soo jeediyay.
2. U qaybi ka qaybgalayaashii kooxo yar yar oo sideed ilaa toban ka qaybgale ka kooban waxana aad waydiisaa in laba ay qabtaan kaalinta goobjoogayaasha. U soo koob kaalinta laga rabo.
 - o Kuwa ka qaybqaadanaya wada hadalka ayaa dooranaya mawduuc ay rumaysan yihiin inuu matalayo aragtiyo soo kala horjeeda oo kooxdu qabato. Tusaale ahaan, xag siyaasadeed, ama xaalad muran dhalinaysa oo bulshada dhexdeeda imika ka taagan, xaga dalka ama gobol. Soo jeedi in la isticmaalo "usha hadalka" si ay u caawiso maaraynta geedi socodka hadalka. Waxa aad xusuusisaa in aanay tani ahayn dood la fududeeyay.

DSHISKA Biriishyada

- Goobjoogayaashu waa in ay kormeeraan wadhadalka diyaarna u noqdaan in ay kala doodaan kooxda dareenkooda ku saabsan wada hadalka, waana in ay si gaar ah u eegaan in xubnaha kooxdu raaceen ama aanay raacin tilmaamihii la soo jeediyay ee la murtiyeeyay intii lagu jiray doodii la hagayay.
- 3. U sheeg koox kasta in ay helaan goob dagan, markaa ay qabtaan dood ku saabsan mawduuca ay doorteen. Ha qaataan ilaa 60 daqiiqo.
- 4. Gabagabada wadhadalka, goobjoogayaashu waxa ay waydiin doonaan in ay buuxiyaan waydiimo gaaban oo ku saabsan khibradii dooda, marka ay dhammeeyaan waxa ay qaban dood gaaban oo ah xog raadin. goobjoogayaashuna waxa ay iyana ka warami dareenkooda gaarka ah ee nooca wada hadalka xiligan.
- 5. Shan iyo toban daqiiqo in ku dhow ka dib marka ay kooxaha yaryari doodaan, waydii kooxdii dhammayd in ay dib u kulmaan si loo qabto doodii u dambeysay ee ku saabsanayd wixii ay soo barten. Buuxi layligii adoo waydiinaya ka qaybgalayaashii sida ay u isticmaalayaan wajigan si ay u caawiyaan dadka iskudhacu dhex yaal in ay si fiican u fahmaan waxa ay isku khilaafsan yihiin

Fiiro gaar ah tababaraha :

Fikradaha iyo istaraatiijiyoyinka la xidhiidha geedi socodka wadhadalku waa fursado muhiim ah oo lagu fududaynayo isku dhacyadii dabada dheeraa ee dhexyaalay buslshooyinka . Marka aanu tilmaanay ahmiyada kaalinta ah in la bilaabo dooda dhab ah oo bulshada dhexdeeda ah, waxa aanu dareemaynaa in la gaabiyay haddii aan la bixin ugu yaraan mid waxbarasho fulin ah, taasi oo siinaysa fursad lagu caawinayo dadka kale in ay kordhiyaan xirfadaha wadhadalka.

Iyada oo aanu jirin sharax cad oo wadhadalka ku saabsani, fikradahan soo socdaa waxa ay caawinayaan sidii loo heli lahaa waxoogaa caddayn ah oo geedi socodka (wadhadalka) ku saabsan iyo balbalaadhintiisa. Waxay inagu siinayaan Linda Ellinor iyo Glenna Gerard buugoodii fikradaha badnaa ee wadhadalka, nuqdado faa'iida leh oo laga doodi karo². Waxa ay kala saarayaan wadhadal iyo dood. Iyaga oo u eegaya arimo is shabaha hadana kala soocan.

Wadhadalku waa ururin iyo caddayn micne ka imanaya dhinacyo badan, halka doodu tahay burburin arinkii dhammaa iyada oo laga dhigayo qaybo badan. Waxa wadhadalku uu u jeedaa dhammaynta wadhadalkii socday iyada oo dhaqdhaqaaqa ka dambeeyaa yahay in la barto lana fidiyo waxa laga ogyahay arin, ama aragtiyo dad badan laga abuurto dareemo cusub. Dhinaca kale marka dhaqdhaqaaqii yahay in la helo hal xal ama ka ugu fiican ee laga dooran karo dhawr arin. Waxa arinku u jeedaa gabagabaynta doodii. Halkan waxa aad ku arki waxyaala kala soocaya oo ay u dhexaysiinayaan Ellinor iyo Gerard wadhadalka iyo dooda/dooda rasmiga ah. Waxa aad u fiirsataa in ay ku soo dareen (dooda rasmiga ah) gabagabada doodan taxanaha ah.

DSHISKA Biriishyada

Wadahadal :

- Iyada oo si guud loo eegayo qaybaha.
- Iyada oo la eego waxa qaybaha isku xidha
- Wax waydiin si loo helo waxyaalaha la malaysanayo
- In wax laga barto waydiimaha iyo muujinta .
- In arima badan micno dhex ah lagala soo baxo.

Dood iyo dood rasmi ah

- Arinkii iyo mushkiladihii oo qaybo loo jajabiyo
- In la eego waxa qaybaha kala soocaya.
- In cudurdaar loo sameeyo lana daafaco fikradaha.
- Gogol xaadh, iibin, sheegid.
- Ku guulaysiga in micno kaliya lagu heshiiyo

Marka aanu jirin cadaadis ku saabsan in la gaadho gabagabo ama xal, ka qaybgalayaasha waxa u fudud in ay bixiyaan aragtiyo kala duwan iyaga oo aan u baahan in ay cudurdaar sheegaan ku saabsan “hagaagsanida” weedhahooda. Ujeedada wadahadlaku waxa weeye in qofba qofka kale wax ka korodhsado lana dhiso micno la wadaago oo kulminaya dhammaan aragtiyihii.

Waxa ay u egtahay in uu jiro heshiis guud oo dhexyaal dadka ka shaqeeya isticmaalka wadahadalka oo ku saabsan sifooyinka muhiimka ah ee sharaxa geedi socodkan. **Waxa ka mid ah:**

- *Joojinta xukun gaadhista:* tani waxa laga yaabaa in ay tahay xirfada uugu adag. Ma aha in la diidayo xukun gaadhistii, waxa se weeye kartida lagu xakamayn karo xukun gaadhistii, ha ahaado kaaga ama ka dadka kale eh, adoo ka eegaya meel dhexdhexaad ah adoon cidina ay ku raadayn dareenkaaguna kicin.

3. Ellinor, Linda iyo Gerard, dib u helitaanka awooda wax badalka ee wada hadalka, (waxa New York ku daabacay 1998kii John Wiley iyo caruurtiisa) pp.201.

Iyada oo laga tagayo filashadii in natiijooyin go’an la gaadho: wada hadlaku ma aha in mushkilad la xaliyo. Waxa se weeye geedi socodkii si wada jir ah mushkiladii lagu helayay. Mana aha arin aan waaqici ahayn haddii la fisho in micnaha iyo fahamka oo la wadaagaa uu keenayo mushkilad xalin.

- *Baadhitaanka dareenka hoose iyada oo su’aalo la isticmaalayo:* “dareemadu waxa weeye sababaha ka dambeeya qiimaynta aynu la soo boodno marka aynu arin wax ka sheegayno” “taasi waxa ay ahayd fikrad fiican, ama mid xun, maxaa yeelay (dareenkii)” waxa aynu gaadhnaa go’aamo, talaabooyin ayaynu qaadnaa had iyo jeer inaga oo cuskanayna xukun aynu gaadhay oo ka soo jeeda dareen aynu qabno. Hadaba fikradahaasi (dareemadaasi) waxa weeye dhagaxda aynu dhiska ka bilowno, taasi oo isa soo biirsatay mudadii nolosheena si noloshu qiimo inoogu samayso . hadaba marka aynu baadhno dhagaxdaa aasaaska ah “iyada oo aynu su’aalo dabagal ah samayno” waxa karti aynu u yeelanaynaa in aynu hagaajino oo aynu wax ka badalno si loo gaadho xukun kii ka duwan markaa go’aano iyo ficil la nimaadno. Si kale hadii loo dhigo,

DSHISKA Biriishyada

dareemada aynu qaadanaa waxa weeye waxyaalaha aynu isleenahay waa garanaysaan ilaa aynu helayno caddayn sidaa ka duwan. Wadahadalkuna waxa weeye qalab taya leh oo hadaba inoo suurta galinaya in aynu ogaano caddaymo kale (oo kuweenii ka duwan).

- **In aad noqoto asli** : si kale haddii loo yidhaa, sheeg waxa aad dareemayso ama rumaysantahay una diyaar garow in aad sheegato .
- Dhimitaanka xawaaraha iyo in aanay hadalada dadka hadlayaa xidhiidsanaan, si micnaha hadaladoodu uu fikirkeena guud uugu duxo.
- In si qoto dheer loo dhagaysto waxa dadka kale iyo inakuba aynu leenahay: inteena badan waa loo soo bandhigay fikradaha iyo xirfadaha dhagaysiga fiican. Waxa iyana muhiim ah in mar kale xiligan la soo bandhigo.

Waxa kale oo lagugu dhiiranayaa in aad dib u booqato doodii wadahadalka ee cutubka 4 ee buuga Akhriyaha.

Goobjoogaha Oo Wadahadalka Lagu Hagayo

Hawlaha soo socda waxa loo qorsheeyay inay kaa caawiyaan geedi socodka wadahadalka lagaa codsaday in aad kormeerto oo aad fikradahaaga dhiibto marka la dhamaystiro. Waa in aad si gaar ah u tilmaamtaa inta suurta gal ah dhaqanada aad aragtay iyo wixii aad maqashay intii wadahadalku socday.

Ku qiimee weedhaha soo socda miisaan darajooyinkiisu yihiin 1 ilaa 5 marka la eego tayada guud ee kooxda, xaga fulinta “qaaciidada” soo socota ee la xidhiidha wadahadalkii ay (dhinacyadu) lahaayeen .kow (1)= waxay u taagan tahay = wax alaala iyo wax tayo ah oo ay leedahay majirto; sedex (3)= waxoogaa tayo ah ayaa jirta, shan (5) = aad bay tayo u leedahay.

1. Kartida xubnaha kooxdu ku joojiyaan in ay xukun gaadhaan.

Tayo la'aan 1 2 3 4 5 Tayo badan

2. Kartida ay u leeyihiin in ay wadaan geedi socodka mushkilad baadhitaanka, halkii ay ka daba gali lahaayeen xalkii mushkilada

Tayo la'aan 1 2 3 4 5 Tayo badan

DSHISKA Biriishyada

3. Kartida ay u leeyihiin baadhitaanka dareemada hoose oo qayb ka ah geedi socodka wadhadalka.

Tayo la'aan 1 2 3 4 5 Tayo badan

4. Kartida xubnuhu u leeyihiin inay ra'ayigooda uun ka hadlaan (oon cidi raadayn), Tayo la';aan

1 2 3 4 5 Tayo badan

5. Gaabinta xawaaraha wadhadalkooda iyo u hogaansanka waqtiga wax la milicsanayo.

Tayo la'aan 1 2 3 4 5 Tayo badan

6. In hadalka qofkiiba mar loo daynayo.

Tayo la'aan 1 2 3 4 5 Tayo badan

7. Muujinta kartida ay u leeyihiin in si xeel dheer ay u dhagaystaan waxa dadka kale sheegayaan.

Tayo la'aan 1 2 3 4 5 Tayo badan.

8. Iyada oo wax laga korodhsado wax waydiinta iyo muujinta arimaha.

Tayo la'aan 1 2 3 4 5 Tayo badan

Haddii aad ku qiimaysay sifooyinkaa la sheegay ee wadhadalka qaar ka mid ah sadex (3) ama wax ka yar, ku qor meesha bannaan ee su'aasha ka hoosaysa sababta aad darajadaa u siisay. Waa in aad xaaladaha si gaar ah u tilmaantaa kugu dhaliyay in aad qiimayntaa gaadho.

Ka fikir qofka kooxda ka mid ahaa ee uugu tayada badnaa xaga isticmaalka mid ama in ka badan oo sifooyinkaa qof ahaaneed ah si uu u hubiyo guulaysiga wadhadalka. Waxa kuu bannaan in aad xusto qof in ka badan adoo eegaya sidii fiicnayd ee ay uuga qayb qaateen wadhadalka.

QALABKA 16: QORSHAYNTA SIDII WAXA LA BARTAY LOO FULIN LAHAA

Ujeedadda xaaladaha waxbarashada intooda badani waxa weeye in lasiiyo ka qaybgalayaasha fursad wax looga badalo oo hore loogu mariyo waxa ay shaqa ahaan u qabtaan ama noloshooda gaar ahaaneedba u qabtaan. Markaa waxa ay u eegtahay caqli gal in lagu gabagabeeyo in qiimaha khibrada waxbarashadu aanu si dhammays ah u haboobayn ilaa ay ka qaybgalayaashu la yimaadaan awood daacad ah oo ay khibrad ahaan si fiican u isticmaalaan wixii ay bardeen.

Iyada oo taasi caqligal u muuqata, waxa jira hadanaa arimo badan oo soo galaya fulinta aqoontii iyo xirfadii cusbayd. Waxyaalaha ku qalindaarayaa mararka qaar waa qaar dibada ka imanaya, sida in kormeeraha ama saaxiibkaa uu iska indha tiro awoodaada wax hagaajinta ama uu la yaabo tijaabada aad isku dayayso fulinta fikrado cusub. Marar kalana waxa kaa hor imanaya gudaha ayay ka imanyaan. Adigu waa aad niyad fiican tahay, hase yeeshee caadooyinkii hore ayaa xoog badan leh. Waxana loo baahan yahay waqti badan, sabir iyo isku kalsooni si loola yimaad dhaqano cusub ama xirfad cusub oo shaqada ku saabsan oo laga yaabo in aanu qofku awoodaa u diyaar ahayn.

Habka u fiican ee jira ee lagu dhiiriyo gudbinta waxbarshadu waxa weeye qorshe la sameysto. Waxa kordhaya inta laga yaabo in aad ka fuliso aqoontii iyo xirfadii hadii aad sii yeelato fikrad hore oo kuu qorshaysan oo ku saabsan waxa aad baratay iyo wax yaalaha kaa hor imanaya ee aad la kulmi doonto marka aad dib ula kulanto dadkii aad shaqada wada lahaydeen (asxaabtii shaqada)

Qaado waqti waxoogaa ah imika si aad u buuxbuuxiso waraaq hawleedkan soo socota, tan oo ah talaaba muhiim ah oo sidii aad uugu diyaarin lahayd naftaada qorshe fulinta waxbarashadii ku saabsaneyd isku dhac maaraynta ah.

- 1) Aniga oo cuskanaya wixii aan ka bartay iskudhac iyo khilaaf maaraynta waxa halkan aan ku tilmaamayaa laba ama sadex arin oo gaar ah oo aan qorshaynayo in aan ka qabto xaaladaha isku dhaca si aan wax fiican uga gaysto.

.....

.....

.....

.....

.....

DSHISKA Biriishyada

2) Waxa aan jecelahay in dadka soo socdaa ay igu taageeraan dadaalkan, waxana aan qorshaynayaa in aan u helo taageeradooda sida tan.

.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....

3) Haddii aan la kulmo caabi marka aan isticmaalayo aqoontayda iyo xirfadahayga cusub ee iskudhac maaraynta, waxa aan qorshaynayaa in aan u gudo galo siyaalaha soo socda.

.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....

DSHISKA Biriishyada

- 4) Kani waa qorshahaygii aan ku dhaqmayay si aan u qiimeeyo guulaysiga istiraatijiyadaydii fulinta iskudhac maaraynta.

.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....

Waxa Af-Soomaaliga u Rogay / Tarjumay oo Tifatiray:
Mohamed Haji Mohamoud Hirsi
L/H Hargeisa Email & Multi-Service
Telephone (Mobile): 410187
Hargeisa – Somaliland
Taariikh: 01-02-2005, 20-12-2004

DSHISKA Biriishyada

GLOSSARY	
ENGLISH	SOMALI
1. Accountability	- Xisaabtan
	- Xilkaa Saaran yahay
2. Action plan	- Qorshe hawleed
	- Wax-qabad hawleed
3. Active Listening	- Dhegaysi feejigan
	- Dhegaysi Darban
	- Dhegaysi Mug leh
4. Alternative	- Kala Doorasho
	- Wax bedeli kara wax kale
5. Application	- Arji
	- Codsii
	- Adeegsi
6. Assessment	- Qiyaasid
	- Qiimayn
7. Authority	- Suldada
	- Awood xukun
8. Awareness	- Wacyi-galin
	- Ka war qab
9. Basic Education	- Wax-barasho Asaasi ah.
10. Beneficiary	- Dan ku Qabe
	- Ka faa'iidayste
11. Capacity Building	- Kobcin wax Qabad
	- Awood dhisid
12. Case Study	- Daraasad Xaaladeed
13. Check list	- Liis Hubineed
14. Civic	- Madani
	- La xiriira magaalo
	- Muwaadin
15. Collaboration	- Gacan siin
	- Wada shaqayn
	- Is Caawimid
16. Committee	- Guddi
17. Communicator	- Gaarsiiye
	- Isgaadhsiye

DSHISKA Biriishyada

18. Community	- Beel - Jaaliyad
19. Community Development	- Horumarin Beeleed - Horumarin Jaaliyadeed
20. Concepts	- Figrado - Aragtiyo
21. Conceptual Hat Rack	- Figrada Metalaada Xilaalka
22. Conflict	- Is-qabad/Khilaaf - Iska hor imaad
23. Consensus	- Rayi la isku raacay - Aqbalaad figrad guud
24. Consequently	- Natiiyo - Cawaaqib
25. Constituency	- Dagaan Doorasho
26. Co-operation	- Iskaashi - Wada shaqayn
27. Council	- Gole
28. Councillor	- Xil-dhibaan Degaan - Xubin ka tirsan Gudiga degaanka
29. Counter productive	- Maax Dumin - Lid ku ah
30. Criteria	- Cabirka wax lagu saleeyo - Qoddobbo wax lagu saleeyo
31. Critique	- Wax lagu Saleeyo
32. Decision Maker	- Goa'aamiye
33. Definition	- Qeexid
34. Delegation/Delegate	- Wefti - Ergo
35. Democracy	- Demoqraadiyad
36. Description	- Tilmaan - Sifo - Sharax
37. Dialogue	- Wada Hadal
38. Effective	- Wax ku ool - Sidii la rabay wax u tarid
39. Effective leadership	- Hogaaminta wax ku oolka ah
40. Efficiency	- Wax qabad fiican leh

DSHISKA Biriishyada

41. Elected Leadership	- Hogaaminta la doortay
42. Empower/Empowerment	- Awood siin
	- Awood u fasaxid
43. Enabler/Enable	- Awood siin
	- Karti siin
44. Essay	- Qormo
	- Maqaal
45. Ethical	- Hab-dhaqan
46. Evaluation/Evaluate	- Qiimayn
47. Evaluation Survey	- Qiimayn Sahan
	- Baaritaan qiimayneed
48. Exercise	- Layli
49. Facilitator	- Fududeeye/Sahle
50. Feed back	- War Celin
	- Jawaab Celin
51. Financier	- Masuul Maaliyadeed.
52. Gender	- Jandar
53. Goal	- Hadaf
	- Gool
54. Good Governance	- Hab Xukun Wanaagsan
	- Hab Maamul
55. Government	- Xukuumad
56. Group Discussion	- Dood kooxeed
57. Guide	- Tilmaamid
	- Hage
58. Hand Book	- Tilmaan Bixiye
	- Tilmaame Bare
59. Human Resources	- Khayraadka Dadka
60. Human Settlement	- Degsiimooyinka Aadanaha
	- Degaamayn
61. Implementation	- Hirgalin
	- Fulin
62. Information	- Xog
	- Wargelin
63. Institution	- Haya'ad
64. Institution Builder	- Haya'ad Dhise

DSHISKA Biriishyada

65. Institutionalise	- Haya'deeye
66. Instruction	- Amar
	- Wax barasho
	- Wax barid
67. Key Point	- Qoddobbo Muhiim ah.
	- Qoddobbo Ma Dhaafaan ah
68. Leadership Process	- Geedi socod Hoggaamineed
69. Learning	- Barasho
	- Wax Barasho
	- Tacliin Barasho
70. Learning Objective	- Ujeeddooyinka Barashada
	- Yoolka Barashada
71. Local Government/Authority	- Dawladda Hoose
72. Majority	- Aqlabiyad
	- Inta Badan
73. Management Process	- Geedi Socodka Maaraynta
74. Meeting	- Kulan
	- Shir
75. Minority	- Inta Yar
	- Laga tiro yar yahay
76. Minutes	- Hadal Qor
	- Hadal qoraal
77. Mission	- Ergo
	- Risaalo
78. Monitoring	- La socod
	- La saan qaad
79. Negotiation/Negotiator	- Wada Xaajood siiye
	- Wada Hadal siiye
	- Gorgoriye
80. Networking	- Shabakadeyn/Nidaam hawleed oo wada shaqaynaya
81. Organization	- Urur
82. Overseer	- Korjooge
83. Overview	- Dulmar/Guud Mar
84. Participants	- Ka-qayb-galayaasha/Kaqayb-qaatayaasha

DSHISKA Biriishyada

85. Perception	- Faham/Dhugmo/Garasho
86. Performance	- Waxqabad/Fulin Hawleed
87. Perspective	- Ka eegid wajio kala duwan
88. Policy	- Qorshe Hawleed/Khidad/Siyaasad
89. Policy Maker	- Siyaasad Dejiye
90. Power Broker	- Awood wax ku qabte/Awood adeegsade
91. Presentation	- Soo Bandhigid/Qadimaad
92. Proactive	- Ka hor dhaaf/Qorshe Curiye/Qorshe raac
93. Process	- Geedi socod/Socodka
94. Questionnaire	- Weydiimo Qoran/weydiimo taxane ah/weydiimo Sahan ah
95. Quorum	- Tirada ugu yar ee shirku ku ansixi karo
96. Rational	- Maan-gal/Macquul
97. Reactive	- Falcelin/Qorshe laawe/Arrin ku baraarug
98. Reference	- Tixraac/Raad raac
99. Reflection	- Ilays noqod/Humaag noqod
100. Resources	- Khayraad
101. Revenue	- Dakhli
102. Role play	- Door-jelid/Door ciyaarid
103. Session	- Fadhi/Kulan
104. Shared Vision	- Aragti wadaag
105. Simple Majority	- Aqlabiyad hal dheeri ah
106. Simulation	- Iska yeelid/U ekeysiin
107. Slums	- Buul caws/Carshaan/Isku raran
108. Solution	- Furdaamin/Xal
109. Stakeholders	- Daneeyayaal
110. Strategic Plan	- Qorshe istaratijiyadeed
111. Strategy	- Istaratijiyad/Tab/xeelad
112. Summary	- Soo koobid/Khulaaso
113. Symptoms	- Astaamo/ Calaamado
114. Systematic	- Habaysan/Nidaamsan
115. Technique	- Farsamo/Xeelad
116. Training Design	-JaanjooyadaTababarka/Naqshadeynta Tababarka
117. Training Material	- Agabka Tababarka/Qalabka

DSHISKA Biriishyada

	Tababarka
118. Training Need Assessment	- Qiyaasid baahida Tababarka/Qiimeynta Baahida Tababarka
119. Transparency	- Wax qaris laa'aan
120. Transparent	- Qof aan waxba qarinaynin.
121. Unanimous	- Loo dhan yahay/Gedigood
122. Vision	- Aragti fog/Aragti dheer
123. Warm up exercise	- Iskulalayn/Qandhicin/Diiran
124. Workshop	- Aqoon Isweydaarsi
Priority two words	
125. Acknowledgment	- Garwaaqsi/Garawsi/Mahad-celin
126. Administrative Fixes	- Adeegsi
127. Analysis	- Gorfeyn/Falanqeyn/Taxliil
128. Assignment	- Shaqo Mucayin ah
129. Assumption	- Maleyn/Si u qaadasho
130. Benchmark	- Bar qiyaaseed/Bartilmameed
131. Challenges	- Caqabad/Loolan/Hardan
132. Collective	- Kooxeed/Urureed/Wadareed
133. Conceptual frame work	- Gadaan-fikradeed/Aasaas fik
134. Constructive	- Wax dhisid/Dhismo-gal
135. Conventional Wisdom	- Xikmad soo jireen ah
136. Corruption	- Musuq-maasuq/Laaluush.
137. Dilemma	- Laba daran mid dooro
138. Diversity	- Kala duwanaan/Kala gedisnaan
139. Encouraging	- Dhiiri-galin/Geesinimo galin
140. Fundamental	- Asal/Aasaasi
141. Identification	- Tilmaamid/Baadi sooc/Aqoonsi
142. Individual Contribution.	- Gacan ka geysi qofnimo/In qof biiri
143. Infrastructure	- Dhismo-hooseed.
144. Input	- Wax galin
145. <i>Insight.</i>	- Aragti Maskaxeed
146. Inspiration	- Maan-godlin/Ra'yi fiican helid
147. Interaction	- Isdhex-gal/isla fal-gal/Isku dhafmid
148. Judgement	- Xukun/Go'aan
149. Land Use Malaise	- Aafada dhul boobka/Dhul ku habsa
150. Multipurpose	- Ujeedo badan/Ujeedooyin kala du
151. Output	- Wax ka soo saarid

DSHISKA Biriishyada

152. Potential Candidate	- Musharax dihin/Musharax iman kara
153. Pre-training	- Tababar horaad/Tababar hortiiis
154. Priority	- Mudnaan
155. Problem Solver	- Furdaamiye/Xaliye dhib
156. Proficiency	- Xirfad Hanasho/Aqoon sare u leh
157. Public	- Guud
158. Public Sector	- Qaybta Guud
159. Public Service	- Adeeg guud
160. Regulation	- Xeer Hoosaad
161. Self Governance	- Isxukumid
162. Self Introduction	- Is-sheegid/Is-tilmaamid
163. Self study	- Isbarid
164. Self Assessment	- Isqiyaasid/Isqiimeyn
165. Shrinking Resources	- Khayraadka sii yaranaya
166. Technical	- Farsamo/Farsamayn
167. Training needs	- Baahi tababar
Priority three Words	
168. Absolute Poverty	- Saboolnimo
169. Absolute	- Gebi-ahaan/Buuxda
170. Application Commitments	- Nidar-gal/Daba-qaad ballan
171. Bureaucracies	- Biroqraadiyad/Xafiisyad Dawladda oo shaqadoodu gaabis tahay
172. Caution	- Taxadar/Digniin
173. Density	- Cufnaan/Jirmiga shega
174. Environmental Degradation	- Hoos u dhac degaan/Hoos u dhac xaaladda degaanka
175. Equilibrium	- Dheeli-tir/Is-le'eg
176. Hawker	- Ha is wareerin/Dadka badeecada naadiya
177. Implication	- Maldahnaan/Hadal aan dhab loo muujin laakiin laga fahmi karo wajiga qofka
178. Jurisdiction.	- Haya'addaha Garsoorka
179. Legal Requirement.	- Baahida Sharciyeed
180. Legislation	- Xeer Degin
181. Legitimate	- Sharci ahaan/Qaanuun ahaan
182. Matchmaker	- Isku aadiye wax isku habboon

DSHISKA Biriishyada

183. Misinterpretation	- Fasiraad xumo/Fasiraad qaldan
184. Off-spring	- Farac
185. Optimistic	- Samo-filasho/Samo arag/Dhanka Wanaagsan ka eeg
186. Partnership	- Wadaag/Wada lahaansho
187. Pessimistic	- Xumo arag/Xuma filasho/Dhanka xun ka eeg
188. Phenomena	- Ifafaalayaal
189. Professional	- Xirfadle/Xeel-dheeri
190. Recycle	- Sameyn celin/Dib u nacfi galin
191. Rules	- Qawaaniin/Xeer
192. Status Quo	- Xaalad taagan
193. Stimulation	- Xiiso galin/Fi-fircooni galin
194. To Wear Different Hats	- Xilqaad badnaan/Kaalimokala duwan qaa
195. Water Pollution	- Dikhaw Biyood/Wasakhaw Biyood/Dhiiq
196. Facilitator	- Fududeeye
197. Financier	- Masuul Maaliyadeed
198. Gender	- Jandar
199. Negotiator	- Wada hadal siiye
200. Overseer	- Korjooge
201. Policy Maker	- Siyaasad dejiye
202. Power Broker	- Awood wax ku Qabte
203. Institution Builder	- Haya'ad dhise

**UN-HABITAT
TRAINING AND CAPACITY BUILDING BRANCH (TCBB)
AND REGIONAL OFFICE FOR AFRICA AND THE ARAB STATES
(ROAAS)**

P.O.Box 30030 GPO Nairobi 00100, Kenya
Telephone: 254-20-623120; Fax: 254-20-624266/7
E-mail: infohabitat@unhabitat.org; Website: <http://www.unhabitat.org>

EUROPEAN COMMISSION